



Jamhuuriyadda Somaliland  
**Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda**

# **MIISAANIYADDA DAWLADDA DHEXE EE 2022**

**Kobcinta  
Dhaqaalaha**

**Amniga**

**Shaqo  
Abuurka**

**Tayaynta  
Adeegga  
Bulshada**

**Daryeelka  
Dhimirka**

## **VOLUME 1**



**Jamhuuriyadda Somaliland  
Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda**

# **Miisaaniyadda Dawladda Dhexe ee 2022**



**Jamhuuriyadda Somaliland**  
**Golaha Wakiiladda**



**The Republic Of Somaliland**  
**House Of Representatives**

**Xafiiska Gudoomiyaha - Office of the Speaker**

Mob: +252-0634245318

*(Hargeisa - Somaliland)*

E-mail: secretaryspeaker@gmail.com

Ref: GW/G/09/16/2022

Date: 15/01/2022

**Ku: Md. Muuse Biixi Cabdi**  
**Madaxweynaha JSL**

= Hargeysa =

**Ujeedo: Soo Gudbin Go'aanka Miisaaniyadda Qaranka 2022.**

***Mudane Madaxweyne,***

Waxaa aan si Sharaf iyo qadarin leh halkan kuugu soo gudbinaynaa Go'aanka Miisaaniyadda Qaranka 2022.

**1. Go'aanka Miisaaniyadda Qaranka 2022 ( Go'aanka Lr.GW/KF-02/922/2022)**

**ALLAH MAHAD LEH**

**Cabdirisaaq Khaliif Axmed**  
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL**



BY PRESIDENCY:  
Reg No: \_\_\_\_\_

**RECEIVED**  
**15 JAN 2022**



The Republic of Somaliland  
House of Representatives



Jamhuuriyadda Somaliland  
Golaha wakiilada

Head Quarter Hargeisa.

Xarunta Hargeisa

Ref: GW/KF-02/922/2022

Date: 15/01/2022

**GO'AANKA ANSIXINTA MIISAANIYADDA DAWLADDA EE 2022-ka**

- MARKUU ARKAY:** Qodobada **53aad, 54aad** iyo **55aad** ee Dastuurka Qaranka.
- MARKUU DHEGAYSTAY:** Xog-waranka **Wasiirka Wasaaradda Maaliyaddu** Ku iftiimiyay odoroska miisaaniyadda Dawladda ee **2022ka**
- MARKUU DHEGAYSTAY:** Xog warankii soo jeedinta iyo talooyinkii Guddi **Hoosaadka Dhaqaalaha** ee Golaha Wakiiladda.
- MARKUU KA DOODAY:** Qaybaha kala duwan ee Miisaaniyadu ka kooban tahay.
- MARKUU U CODEEYAY:** Ansixinta odoroska **Miisaaniyada Dawladda** ee sanadka **2022ka** kal-Fadhigii **2aad** fadhigisii **14aad** ee **15/01/2022** oo ay goob joog ahaayeen **67 Mudane** oo ka mid ah mudanayaasha Golaha Wakiiladda.

**WUXUU COD AQLABIYAD AH (57 COD) OO GACANTAAG AH KU**  
**ANSIXIYAY**

1. Odoroska miisaaniyada **2022** oo qadarkeedu dhanyahay **3,447,802,505,538 sl.sh** ( saddex tiriliyan, afar boqol todaba iyo afartan bilyan, sideed boqol iyo laba milyan, shan boqol iyo shan kun, shan boqol iyo sideed iyo sodon shilin)



### Faah-faahinta Dakhliga Miisaniyada 2022

No.	Magaca	Budget 2021	Budget 2022	Faraqa
1.	Miisaaniyadda Dawladda Dhexe	2,167,000,464,800	2,410,452,894,335	243,452,429,535
2.	Miisaniyada Dawladaha Hoose	368,002,568,138	528,878,259,786	160,875,691,648
3.	Miisaaniyadda Hay'addaha Madaxa Banaan	247,784,583,075	276,986,730,707	29,202,147,632
4.	Miisaniyadda Mashriicda Baanka Aduunka	63,917,897,120	51,889,758,410	-12,028,138,710
5.	Miisaaniyadda Sanduuqa (SDF)	88,111,716,000	96,854,072,980	8,742,356,980
6.	Miisaaniyadda Mashruuca maamul-daadejinta JPLG	12,600,000,000	19,894,061,320	7,294,061,320
7.	GIZ (RDRM project)		27,132,000,000	27,132,000,000
8.	ILED (ILED project)		35,714,728,000	35,714,728,000
	<b>Wadarta Guud</b>	<b>2,947,417,229,133</b>	<b>3,447,802,505,538</b>	<b>500,385,276,405</b>

### **Go'aamada Lagu soo Daray Miisaaniyadda Qaranka ee 2022**

Golaha Wakiiladu, ka dib markuu darsay, Odoroska Miisaniyadda 2022-ka, isla markaana ay dul istaagtay dhammaan qaybaha kala duwan ee Miisaniyaddu ka koobantahay.

#### **Wuxuu ku lifaaqaya miisaniyadan 2022 Go'aamadan :-**

1. Waa in Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu 2%-ka horumarinta gobolada Barri ay kusoo dhamaystirto Miisaniyadda 2023-ka isla markaana ay soo mashaariicayso 70%



2. Waa in Miisaaniyadda Dawladdaha Hoose iyo Hay'addaha Madaxa banaan dib u eegis lagu sameeyo isla markaana loo diyaariyo hannanka casriga ah (**Standard Charts Accounts**) si kor loogu qaado daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka.
3. Waa in Dhammaan Haay'addaha aan haysan Xeer lagu Aass-aas oo Golayaashu ansixiyeen isla markaana hela qoondo Miisaaniyadeed sida (Ciidanka Dab-damiska, Hay'adda Cilmi baadhista Beeraha, Madbacada Qaranka, Haamaha Shidaalka ay Golaha ku hor keenaan muddo lix bilood Gudahood.
4. Waa in Misaaniyadda 2023-ka lagu soo daraa Dakhliga iyo kharashaadka Hay'addaha aan ku jirin Misaaniyadda si loo helo Miisaaniyad dhamaystiran.
5. Waa in lays waafajiyo, la daa-dajiyo, lana gaadhsiiyo dhamaan Dowladdaha hoose ee degmooyinka dalka oo Misaaniyadda lagu soo dhamaystiro qoondada kabka 12.5%, loona raaco Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka **23/2019**.
6. Waa in Kaalmadda Miisaaniyadda ee Dugsiyadda la siiyo loogu qaybiyo tirada Ardayda.
7. Waa in Wakaaladdaha Biyaha iyo Hay'addaha Madaxa Bannaan Maamulka Maaliyaddooda iyo habka bixinta Qandaraasyadda lagu sammeeyo Maamul toosin lana waafajiyo Nidaamka Casriga ah ee Maamulka Maaliyadda iyo habraaca Qandaraasyadda Qaranka.
8. Madama Qaabdhismeedka Komishanka Tamarta aanu Waafaqsanayn Xeerka Tamarta Qaranka ee **Lr.81/2018** waa in Muddo Lixbilood ah uu ku Saxaa Madaxweynuhu Qaab dhismeedka Komishanka Tamarta Qaranka.
9. Waa in Kaalmadda la siiyo Kooxaha Fannaninta Qaranka ay si siman ugu qaybiso Wasaaradda Warfaafinta Qaranku.
10. Waa in Diyaarinta iyo soo gudbinta Miisaaniyadda loo raaco Xeerka Maamulka Maaliyadda Qaranka Xeer **Lr.75/2016** iyada oo la sugaayo muddada Golaha loo soo gudbinaayo sida ku qoran Xeerka.



11. Waa in Sanadka 2022-ka Dawladda Hoose ee Gabiley ay isticmaasho Miisaaniyaddii hore 2021, dakhliga dheeraadka ah ee soo baxana waa in la mashaariceeyo isla markaana laga ansixiyo Gola Degaanka ee Degmadda.
12. In Miisaaniyadda 2023-ka loo kordhiyo Mushaharka Macalimiinta iyo bahda Caafimaadka
13. In qoondooyinka (Accounts) Kaydadka Qaranka ee ku jira Miisaaniyadda Qaranka ay Wasaaraddu usoo gudbisgo Golaha Wakiilada hadhaaga ku jira Sanad Miisaaniyadeed kasta
14. In Sanad Miisaaniyadeed Kasta ay Wasaaraddu soo gudbisgo Xogta Daymaha Qaranka
15. In Wasaaraddu soo Gudbisgo sanad Miisaaniyadeed kasta Warbixinta Faa'idadda iyo kharaasaha Mashaarica Maalgalined ee Dawladdu ku jirto
16. In Magacyadda Wasaaraddaha iyo Hay'addaha ku jira Miisaaniyadda loo raaco sida uu dhigaayo Xeerka Kala Xadaynta Nidaamka Xukuumadda iyo Hay'addaha Madaxa bannaan ee Xeer Lr.71/2015
17. In Dawladdu xooga saarto isla markaana dhiiri galiso Wax soo saarka Gudaha.
18. Madaxyada wax-laga jaray iyo qaybaha wax lagu daray

MADAXYADDA WAX LAGA JARAY			
Qaybaha Kharashyadda	Miisaaniyadda 2022	Percent	L.lajaray SLSH
Kharashka Alaabta iyo Adeega	443,191,323,338	5.5%	24,375,522,784
Kharashka Lama Filaanka	63,157,500,000	20%	12,631,500,000
Iibsiga Saamiga Fiber Opticts	14,000,000,000	50%	7,000,000,000
Sanduuqa Aqoonsi Raadinta korodhka 2022 oo dhama 40%	7,900,000,000	50%	3,950,000,000
Kharashaadka kale	56,260,298,315	20%	11,252,059,663
<b>Total</b>			<b>59,209,082,447</b>



MADAXYADDA/QAYBAHA WAX LAGU KORDHIYEY			
Hay'addaha	Miisaniyadda	Korodh	L. Kordhiyey SLSH
Mushaharka Ciidamadda	386,861,682,320	10%	38,686,168,232
Mashruuca Doorashooyinka Doorashada		7,000,000,000	7,000,000,000
Guddida Tacliinta Sare		437,000,000	437,000,000
Wasaaradda Waxbarashada iyo Sayniska <b>Mushahar Shaqaalaha ku-meel gaadhka ah oo dhan (100)</b>		1,000,000,000	1,000,000,000
Wasaaradda Waxbarashada iyo sayniska <b>(Xarunta Agoomaha Hargaysa)</b>		200,000,000	200,000,000
Wasaaradda Waxbarashada iyo Sayniska <b>(Kaalmadda Xarunta Ubad Gar- Gaar )</b>		167,000,000	167,000,000
Wasaaradda Shaqo-Galinta ,Arrimaha Bulshada iyo Qoyska <b>(Kaalmadda Ururka Naafadda ee SDHO)</b>		500,000,000	500,000,000
Wasaaradda Shaqo-Galinta ,Arrimaha Bulshada iyo Qoyska <b>(Kaalmadda Ururka Agoomaha Taban Taabo)</b>		200,000,000	200,000,000
Wasaaradda Shaqo-Galinta ,Arrimaha Bulshada iyo Qoyska <b>(Kaalmadda Ururka Adams Academy)</b>		300,000,000	300,000,000





Wasaaradda Horumarinta Biyaha (Mashruuca Biyo ballaadhinta Ceerigaabo)		2,800,000,000	2,800,000,000
Wasaaradda Horumarinta Biyaha (Kaydka Biyaha Burco)		2,800,000,000	2,800,000,000
Wasaaradda H.Caafimaadka  Mushaharka Shaqaalaha ku- meel gaadhka ee Caafimaadka oo dhan (200)		2,000,000,000	2,000,000,000
Wasaaradda H.Caafimaadka  (Dhismaha Cisbitaalka TB ee Borama)		1,400,000,000	1,400,000,000
Wasaaradda Gadiidka iyo H.Jidadka  (Dhismaha Waddada Baki)		1,400,000,000	1,400,000,000
Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta  (Kaalmadda Guddida Wanaag Farinta)		318,914,214	318,914,214
<b>Total</b>			<b>59,209,082,446</b>

Ansixinta Miisaaniyada waxaa diiday **lix (6) mudane**, halka saddex **(3) mudane-na** ka aamuseen , Gudoomiyuhuna muu codayn sida caadada ah.

Miisaaniyadani waxay dhaqan gelaysaa marka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland soo saaro Digreetada dhaqangelinta.

**ALLAA MAHAD LEH**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**  
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL

**Cabdirisaaq Khaliif Axmed**  
Gudoomiyah Golaha Wakiilada JSL

6





JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

## Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-807/012022

Taar: 17/01/2022

## Wareegto Madaxweyne

### Dhaqan-galka Miisaaniyad Sannadeedka 2022-ka

Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Go'aanka Golaha Wakiillada, Go'aan Lr. GW/KF-02/922/2022, ee ku taariikheysan 15/01/2022, ee ay ku ansixiyeen Miisaaniyad Sannadeedka 2022-ka;

#### Waxaan soo-saaray;

Wareegtadan oo lagu baahinayo Dhaqan-galka Miisaaniyad Sannadeedka 2022-ka oo ka kooban Miisaaniyadda Dawladda Dhexe, Hay'adaha Madaxa-bannaan, Dawladaha Hoose, Sanduuqa Horumarinta Somaliland (SDF), Mashruuca Maamul-daadejinta Dawladaha Hoose (JPLG), Mashaariicda Baanka Adduunka, Mashruuca Hay'adda GIZ iyo Mashruuca ILED.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland





Jamhuuriyadda Somaliland  
Wasaaradda Horumarinta  
Maaliyadda



Republic of Somaliland  
Ministry of Finance  
Development

## Xafiiska Wasiirka

Ref: WM/02/08-01/ /2021

Date: 18-12-2021

Ku: Shir-Gudoonka iyo Mudanayaasha Golaha Wakiilada JSL

Hargeysa

### Ujeedo: Soo gudbinta Miisaaniyadda Qaranka ee 2022

Mudane Gudoomiye, Gudoomiye ku xigeenayaal iyo Mudanayaal;

Aniga oo ka wakiila Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda oo gudanaysa waajibka Dastuurka Qaranka qodobkiisa 55<sup>aad</sup> farqadiisa 1<sup>aad</sup>, iyo xeerka Maamulka Maaliyadda ee **Xeer No. 75/2016** qodobkiisa 5 aad, waxaan si weyn ugu faraxsanahay in Maanta oo ay taariikhdu tahay **18-12-2021** idiin soo gudbiyo Miisaaniyadda guud ee Dawladda ee Sannadka 2022 oo ah Miisaaniyaddii 31<sup>aad</sup> ee qarankani yeesho.

**Dr. Sacad Cali Shire**  
**Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda**



# Tusmada Buuga

<b>1</b>	<b>HORDHAC</b> .....	<b>1</b>
<b>2</b>	<b>GUUD-MARKA DHAQAALAHA</b> .....	<b>2</b>
2.1	Muuqaalka Saadaasha Dhaqaale ee Somaliland .....	2
<b>3</b>	<b>HANTAAQOYINKA GUUD EE KU YIMID DHAQAALAHA</b> .....	<b>3</b>
3.1	Saamaynta Caalamiga ah ee Xanuunka Safmarka ah ee COVID-19.....	3
3.1.1	Dhibaataada Deyn Qaadasho ee Xanuunka Covid-19 Afrika ku keenay .....	4
3.2	Heerka Xanuunka Covid-19 Somaliland ee billaha January ilaa September 2021 ...	4
3.3	Ayaxa.....	6
3.4	Joojinta Xoolihii loo Dhoofin jiray Xajka .....	7
3.5	Xaalada qala-laase ee ka jirta Dalka Itoobiya .....	7
<b>4</b>	<b>XAALADA GUUD EE DHAQAALAHA</b> .....	<b>8</b>
4.1	Sicir-bararka .....	8
4.2	Sarrifka Lacagta.....	9
4.3	XAWAALADDAHA.....	10
4.4	GANACSIGA .....	11
4.4.1	Dhoofinta Xoolaha .....	11
4.4.2	Soodejinta .....	12
<b>5</b>	<b>SHAQAALAYSIINTA DAWLADDA 2018 ILAA 2022</b> .....	<b>14</b>
<b>6</b>	<b>CIMILADDA</b> .....	<b>15</b>
6.1	ROOBABKA DA'AY 2021 .....	15
<b>7</b>	<b>WARBIXINTA HAB-SAMI U SOCODKA MIISAANIYADDA 2021</b> .....	<b>16</b>
7.1	Soo jireenka warbixinta wax-qabadka Miisaaniyadda.....	16
7.2	Dakhli Uruurinta Jan-Sep 2021.....	16
7.3	Kharash-galka Dowladda Jan-Sep 2021.....	19
7.4	Is-barbardhiga kharash-galka Dowladda 2020 iyo 2021 .....	19
7.5	Warbixinta Mashaariicda 2% Horumarinta Gobolada Barri 2021.....	21
7.6	Kharash galka Mashaariicda Bangiga Adduunka ee Jan-Sep 2021 .....	22
<b>8</b>	<b>MIISAANIYADA DOWLADDA DHEXE 2022</b> .....	<b>23</b>
8.1	Siyaasadaha Miisaaniyadda 2022 .....	23
8.1.1	Siyaasadda Maaliyaddeed (fiscal policy).....	23
8.1.1.1	10% Cashuur Dhimista Raashinka Quutul-Daruuriga ah.....	23
8.1.1.2	Isku dheeli tirka Dakhlige iyo kharashka .....	23
8.1.1.3	Kor u qaadida saamiga ay Cashuuraha berrigu ka yihiin Dakhlige guud .....	23
8.1.1.4	Ilaalinta iyo kobcinta waxsoo-saarka gudaha .....	23
8.1.1.5	Diyaarinta Aagga loogu talo galay Warshadaha (industrial Zone).....	24



8.1.1.6	Sii wadida Mashruuca Shaqo Qaran.....	24
8.1.1.7	Kaydka ku -talo galka Dhacdooyinka lama filaanka (Contingency fund).....	24
8.1.1.8	Abuurida Sanduuqa wax ka qabashada Xanuunka Covid-19, iyo ku darista Miisaaniyadda Dakhliga ka soo xarooda Covid-19. ....	24
8.1.1.9	Joojinta qaadista lacagaha aan sharciga ahayn (illegal fees).....	24
8.1.1.10	Fududeynta Nidaamka Cashuur bixinta. ....	25
8.1.1.11	Hirgalinta dhamaan qaybihiisa kala duwan Nidaam Xisaabeeda iswada ee (SLFMIS)25	
8.1.1.12	Ka Qayb qaadashada Diyaarinta Miisaaniyadda ee Bulshada rayidka ah.....	25
8.1.2	Siyaasadda lacageed (Monetary policy) .....	26
8.1.2.1	Sicir bararka .....	26
8.1.2.2	Isku bedelka Sarifka lacagaha .....	26
8.1.3	Meelaha Mudnaanta la siiyey Miisaaniyadda 2022.....	26
8.2	Guud-marka Guud ee Odoroska Dakhliga 2022.....	27
8.2.1	Meelaha la filayo in uu ka yimaado korodhka Dakhliga 2022 .....	27
8.2.2	Faah-faahinta Goobaha uu Dakhligu ka imanayo Miisaaniyadda 2022 .....	28
8.2.3	Oodoros Dakhliga Kastamada oo Deegamaysan 2022.....	29
8.2.4	Oodoros-ka Dakhliga Cashuuraha Berriga 2022 oo Deegamaysan .....	30
8.3	Faah-Faahinta kharashka Miisaaniyadda 2022 .....	32
8.3.1	Saamiga Wadaagayaasha ee Miisaaniyadda 2022 .....	32
8.3.1.1	Amaanka .....	32
8.3.1.2	Maamulka.....	33
8.3.1.3	Caafimaadka .....	34
8.3.1.4	Waxbarshada .....	34
8.3.1.5	Tamarta .....	35
8.3.1.6	Waxsoo-saarka.....	35
8.3.1.7	Deegaanka .....	36
8.3.1.8	Biyaha .....	36
8.3.1.9	Dhaqaalaha .....	37
8.3.1.10	Kaabayaasha Dhaqaalaha.....	37
8.3.1.11	Wadaagaha kale (cross-cutting Sector).....	38
8.3.2	Soo Koobida Qeybaha Miisaaniyadda 2022 .....	38
8.3.2.1	Kharashka Shaqaalaha .....	39
8.3.2.2	Karashka Alaabta & Adeegga Ama Hawl socodsiinta .....	40
8.3.2.3	Hantida Raagta.....	40
8.3.2.4	Mashaariicda Kale ee Dawladda.....	41
8.3.2.5	Kaalmooyinka & Daryeelka Bulshada ee Dawladdu Bixiso .....	41
8.3.2.6	Daynta Qaranka .....	41
8.3.2.7	Kharashka lama filaanka ah.....	42
<b>9</b>	<b>MASHAARIICDA AY MAALGALINAYAAN QAADHAAN BIXIYEYAASHU 2022....</b>	<b>43</b>
9.1	Mashaariicda Baanka Aduunka (World Banka Projects) .....	43
9.1.1	Mashruuca Dib u Habeynta Shaqaalaha Dawladda .....	43
9.1.2	Mashruuca Horumarinta Korontada.....	44



9.1.3 Mashruuca dibu habaynta Maamulka Maaliyadda (PFM).....	44
9.2 Sanduuqa Horumarinta Somaliland (SDF).....	44
9.3 Mashaariicda kobcinta dhaqaalaha Dadka Nugul iyo Horumarinta kaabayaasha dhaqaale ee bulshada.....	45
9.4 Mashruuca Maamulka khatarta Dabiiciga ah iyo Cuntada.....	45
9.5 Mashruuca Maamul daadajinta Dawaladah Hoose (JPLG) .....	46
<b>10 MIISAANIYADDAHA DOWLADDAHA HOOSE IYO HAY'ADDAHA MADAXABANAAN EE 2022.....</b>	<b>47</b>
10.1Miisaaniyadda Hay'addaha Madaxabanaan .....	47
10.2Miisaaniyaddaha Dowladdaha Hoose.....	47
<b>11 DAKHLIYADA MIISAANIYADDA KA BAXSAN EE AY QABATO W/H/MAALIYADDU .....</b>	<b>49</b>
<b>12 APPENDIX.....</b>	<b>49</b>
12.1Appendix A: Liisak Mashaariicda, Dhismayaasha iyo libsiga Hantida Raagta ee Miisaaniyadda 2022: .....	49
12.2Appendix B: Liiska Mashaariicda 2% Horumarinta Goboladda Barri ee laga Fuliyey Gobolka Sanaag Sanaddada (2018, 2019, 2020 iyo 2022) .....	53
12.3Appendix C: Liiska Mashaariicda 2% Gobolada Barri ee Gobolka Sool Sanaddada 2018, 2019, 2020 iyo 2021 .....	54
12.4Appendix D: Dhismayaasha Dugsiyada Miisaaniyadda 2022 .....	55
12.5Appendix E: Liiska Dhismayaasha Library-yada iyo Xarumaha.....	55
12.6Appendix F: Liiska Qodista Balliyada.....	56
12.7Appendix G: Liiska Qodista Ceelasha Dhaadheer .....	56
<b>Dakhliga Guud ee 2022 .....</b>	<b>57-59</b>
<b>Miisaaniyadda Guud ee Dawladda 2022 .....</b>	<b>60-61</b>
<b>Faahfaahinta Qorshaha Miisaaniyadda ee Qaybaha Dalka .....</b>	<b>62-64</b>
<b>Faahfaahinta Qorshaha Isticmaalka Miisaaniyadda ee 2022 .....</b>	<b>65-73</b>
<b>Soo koobidda Mashaariicda Deeqaha Dibedda ee 2022 (Multi-lateral Fund).....</b>	<b>74-75</b>
<b>Faahfaahinta Mashaariicda Deeqaha Dibedda 2022 (Multi-lateral Fund).....</b>	<b>76-83</b>



## Shaxda Miisaaniyadda Wasaaraddaha & Hayaaddaha 2022

Qasriga Madaxtooyada JSL.....	84
Madax-weyne ku-Xigeenka JSL.....	85
Komishanka Qaranka ee Xakamaynta HIV/ AIDS .....	86
Golaha Guurtida JSL.....	88
Golaha Wakiilada JSL.....	90
Maxkamadda Sare. ....	92
Max-kamadda Hoose. ....	94
Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka.....	96
Hay'adda Shaqaalaha Dawladda.....	98
Machadka Shaqaalaha Dawladda .....	100
Hanti-dhawrka Guud ee Qaranka.....	102
Xafiiska Madaxtooyadda. ....	104
Ciidanka Ilaaladda Madaxtooyada. ....	106
Garyaqaanka Guud. ....	108
Hayadda Sirdoonka Qaranka .....	110
Jimciyadda Muj.Sooyaal .....	112
W.Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah .....	113
Wasaaradda Cadaaladda & Garsoorka.....	115
Ciidanka Asluubta.....	117
Guddiga Xaquuqal Insaanka Qaranka. ....	119
Wasaaradda Arrimaha Gudaha.....	121
Ciidanka Booliska. ....	123
Ciidanka Ilaalada Xeebaha.....	125
Ciidanka Socdaalka. ....	127
Ciidanka Dab-Demiska Qaranka Somaliland.....	129
W.Warfaafinta, Wacyigelinta iyo Dhaqanka.....	130
Wasaaradda Gaashandhigga.....	132
Ciidanka Qaranka. ....	134
W.Qorshaynta & Horumarinta Qaranka .....	136
Wasaaradda H. Maaliyadda.....	138
Hay'adda Caymiska Qaranka .....	142
Wasaaradda Ganacsiga iyo Dalxiiska .....	144
Hay'adda Aagga Cashuuraha ka caaggan .....	146
Wasaaradda Macdanta & Tamarta.....	148
Komishanka Tamarta .....	150
Wasaaradda Gaadiidka iyo H. Jidadka .....	152
Wasaaradda H. Beeraha.....	154
Hay'adda Cilmi baadhista Beeraha .....	156
Wasaaradda Xanaannada Xoolaha iyo H. Kalumaysiga .....	158
Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tignoolojiyada .....	160



Wasaaradda Waxbarashada & Sayniska . . . . .	162
Gudiga Tacliinta Sare . . . . .	165
Wasaaradda H. Caafimaadka . . . . .	167
Komishanka qaranka ee Mihnadlayaasha caafimadka . . . . .	170
Wasaaradda Diinta & Awqaafta . . . . .	172
Hay'adda Diiwaanka Sakada iyo Safalka . . . . .	174
Wasaaradda Hawlaha Guud,Dhulka & Guriyaynta . . . . .	176
H. Duulista & Hawada . . . . .	178
Wasaradda Xidh Golayaasha iyo Arimaha Distoorka . . . . .	180
Komishanka dib u habaynta shuruucda . . . . .	182
Wasaaradda Shaqagalinta, A. Bulshada & Qoyska . . . . .	183
Wasaaradda Ciyaaraha iyo Dhalinyarada . . . . .	185
Guddiga Doorshooyinka Qaranka . . . . .	187
Guddiga Qandaraaska Qaranka . . . . .	189
Hayada u Diyaargarowga Aafooyinka iyo Kaydka Raashinka . . . . .	191
Hay'adda Dhawrista Tayada . . . . .	193
Gudida Maamulwanaaga iyo La-dagaalanka Musuqmaasuqa . . . . .	195
Hayada Qaxootiga iyo Barakacayaasha . . . . .	197
Wasaaradda Degaanka . . . . .	199
Wasaaradda Horumarinta Reermiyiga . . . . .	201
Guddida Diwaangalinta Ururada . . . . .	203
Wasaarada H. Maalgashiga & Wershedaha . . . . .	205
Wasaaradda H. Biyaha . . . . .	207
Mashaariicda Deeqaha Debedda . . . . .	209
Dawlada Hoose . . . . .	210
Hay'adaha Madaxa-bannaan ee Dawladda . . . . .	211





# Liiska Shaxaha

Shaxda 1: Miisaaniyadda Guud ee 2022.....	1
Shaxda 2: wax soo saarka Guud (GDP) ee Dalalka ay Somaliland jaarka yihiin iyo kuwa ay Ganacsi wadaaga leeyihiin 2019-2022 (IMF October 2021) .....	4
Shaxda 3: Xaalada Xanuunka Covid-19 ee billaha January ilaa September 2021.....	5
Shaxda 4: Cel-celiska Sicir bararka oo Rubuc Rubuc ah 2020 ilaa 2021.....	8
SHAXDA 5: Saadaasha Mudada dhexe ee heerka sicir-bararka Somaliland .....	9
SHAXDA 6: Is-barbardhiga Wadarta Tirada Xoolaha Dhoofay Rubaca 3aad ee Sanaddada 2019, 2020 iyo 2021.....	11
SHAXDA 7: Saadaasha Mudada -dhexe ee koboca Qiimaha badeecadaha la keeno Somaliland .....	13
SHAXDA 8: Korodhka Shaqaalaha Dowladda 2018 ilaa 2022.....	14
Shaxda 9: Uruurinta Dakhlig dhabta ah iyo Odoroska Dakhliga oo kooban (SLSH) Jan-Sep 2021 .....	17
Shaxda 10: Meelaha Mudnaanta la siiyay Miisaaniyadda 2022 .....	26
SHAXDA 11: Faaf-faahinta Goobaha uu Dakhligu ka imanayo Miisaaniyadda 2022.....	28
SHAXDA 12: Odoros Dakhliga Kastamada ee Miisaaniyadda 2022 oo Deegaamaysan .....	29
SHAXDA 13: Odoroska Dakhliga Cashuuraha Berriga Miisaaniyadda 2022 oo Deegaamaysan .....	31
SHAXDA 14: Saamiga Wadaagayaashu ka yihiin Miisaaniyadda 2022 .....	32
SHAXDA 15: Wadaagaha Amaanka iyo Dufaaca .....	33
SHAXDA 16; Wadaagaha Maamulka.....	33
SHAXDA 17: Wadaagaha Caafimaadka.....	34
Shaxda 18: Wadaagaha Waxbarashada.....	35
Shaxda 19: Wadaagaha Waxsoo-saarka .....	36
Shaxda 20: Wadaagaha Deegaanka.....	36
Shaxda 21: Wadaagaha Biyaha Biyaha.....	36
Shaxda 22: Dhaqaalaha.....	37
SHAXDA 23: Soo koobida Qeybaha waaweyn ee Miisaaniyadda 2022 ka kooban tahay.....	39
SHAXDA 24: Mashaariicda ay Maalgalinayaal Qaadhaan bixiyayaashu Miisaaniyadda 2022 .....	43
SHAXDA 25: Miisaaniyadaha Hay'addaha Madaxabanaan ee Sannadka 2022 .....	47
SHAXDA 26: Miisaaniyadda Dowladdaha Hoose ee Sanadka 2022.....	48
SHAXDA 27: Dakhliga Miisaaniyadda ka baxsan ee ay qabto W/H/Maaliyadu .....	49



## Liiska Jaantuusyada

Jaantuus 1: tirada dadka la baadhay, inta laga helay iyo Tirada dhimasha Xanuunka Covid-19 Billaha Jan-Sep 2021.....	6
Jaantuus 2: Sicir bararka Sannadlaha ah ee Qaybaha waaweyn (sanadka laga duulayo 2012) .....	8
Jaantuus 3: Heerka sarrifka shilinka Somaliland ee USD iyo heerka sicir-bararka (%) January 2018 ilaa September 2021 .....	9
Jaantuus 4: Xawilaadaha lacagaha la soo diray iyo kuwa laga diray Somaliland jan-2020 ilaa Sep 2021 (US\$ Millions) .....	10
Jaantuus 5: Wadarta Xoolaha dhoofay oo bille ah ilaa 2019 (Bidix) iyo Noocyada Xoolaha dhoofay intii u dhaxaysay Jan-Sep 2020 iyo 2021 (Mididg) .....	12
Jaantuus 6: is bed-bedelka Sanadadii hore iyo Saadaasha Mudada dhexe ee qiimaha Korodhka wax soo dejinta Somaliland .....	13
Jaantuus 7: Shaxda Tirada Shaqaalaha 2018 ilaa 2022 .....	14
Jaantuus 8: Cabirka Heerka Roobabka (MM) ee laga diiwaangeliyey 20 goobood oo kala duwan Jan-Sep 2021 .....	15
Jaantuus 9: Odoraska Dakhliga iyo Dakhliga dhabta ah ee Sannadaha 2017-2020.....	16
Jaantuus 10: Wadarta Dakhli Ururinta iyo Hay'addaha ka Masuulka ah (Billion SLSH) Jan-Sep 2021.....	18
Jaantuus 11: Dakhli Ururinta Kastamada iyo Cashuuraha Berriga oo Goobaysan, Jan-Sep 2021.....	18
Jaantuus 12: Kharash galka Dowladda oo Sadex bilood leh ah 2019, 2020 iyo 2021 Billions SLSH .....	19
Jaantuus 13: Isbarbar dhiga kharash-galka Dowladda oo Qayb-Qaybsan 2020-2021 .....	21
Jaantuus 14: Kharash galka Mashaariicda uu Maalgaliyo Bangiga Aduunku Jan-Sep 2021 .....	22
Jaantuus 15: Goobaha uu Dakhligu ka imanayo Miisaaniyadda 2022 .....	29
Jaantuus 16: Saamiga Goob Waliba ka tahay Wadarta Guud ee Kastamada Miisaaniyadda 2022 .....	30
Jaantuus 17: Saamiga Goob waliba ka tahay Wadarta Guud ee Cashuuraha Berriga .....	31
Jaantuus 18: Saamiga Wadaagayaashu ka yihiin Miisaaniyadda 2022 oo (%).....	32
Jaantuus 19: Soo Koobida Qeybaha Miisaaniyadda 2022 .....	39



## 1 Hordhac

Miisaaniyadda 2022 waxay ka kooban tahay:

1. Miisaaniyadda Dawladda Dhexe
2. Miisaaniyadda Hay'adaha Madaxa-banaan
3. Miisaaniyadda Dawladaha Hoose
4. Miisaaniyadda Sanduuqa Horumarinta Somaliland ee ay maalgeliyaan wadamada Deeq bixiyeyaashu (Somaliland Development fund)
5. Miisaaniyadda Mashuuca Maamul-daadejinta (JPLG)
6. Miisaaniyadda Masaariicda Bangiga Aduunka
7. Miisaaniyadda Mashruuca GIZ iyo
8. Miisaaniyadda Mashruuca Iled.

Isugeynta guud ee Miisaaniyadda sannadka 2022 waa **3,447,802,505,538 SLSH** sida shaxda hoose ka muuqata. Miisaaniyadda dawladda dhexe waa **2,410,452,894,335 SLSH**, taas oo ka badan tii hore **243,452,429,535 slsh** una dhiganta **11.2%**.

### Shaxda 1: Miisaaniyadda Guud ee 2022

Faahfaahinta	Miisaaniyadda 2021	Miisaaniyadda 2022	Farqi	Farqi %	Miis Guud %
Miisaaniyadda Dawladda Dhexe	2,167,000,464,800	2,410,452,894,335	243,452,429,535	11%	70%
Miisaaniyadda Dawladdaha Hoose	368,002,568,138	522,990,984,506	154,988,416,368	42.12%	15.19%
Miisaaniyadda Hay'addaha Madaxa -banaan	247,784,583,075	276,986,730,707	29,202,147,632	12%	8.0%
Miisaaniyadda Mashaariicda Bangiga Aduunka	63,917,897,120	51,889,758,410	-12,028,138,710	-19%	1.5%
Miisaaniyadda Sanduuqa (SDF)	88,111,716,000	96,854,072,980	8,742,356,980	10%	2.8%
Miisaaniyadda Mashruuca Maamul-daajejinta (JPLG)	12,600,000,000	19,894,061,320	7,294,061,320	58%	0.6%
GIZ (RDRM Project)		27,132,000,000	27,132,000,000	100%	0.8%
ILED (Iled Project)		35,714,728,000	35,714,728,000	100%	1.0%
<b>Wadarta Guud</b>	<b>2,947,417,229,133</b>	<b>3,441,915,230,258</b>	<b>494,498,001,125</b>	<b>16.78%</b>	<b>100%</b>

**Note:** Miisaaniyadda Dawladda hoose ee Degmada Gebiley Baarlamaanku wuxu u ansixiyey in lagu dhaqmo Miisaaniyaddii 2021, iyadoo wixii Dakhliga dheeraad ka-ahna loo isticmaali doono Mashaariic horumarineed marka Golaha degaanka Gebiley ansixiyaan.



## 2 Guud-marka Dhaqaalaha

Abaartii dhacday sanadkii 2017 iyo xayiraadii dhoofka Xoolahu waxay sababeen in Dhaqaaluhu hoos u dhaco. Balse dhaqaalaha ayaa ka soo kabtay hoose u dhacii ku yimid 2017, isla markaana sameeyay kor u kac sanadada 2018 iyo 2019.

Kobocii Dhaqaaluhu sameeyay 2019, waxa mar kale dhaawacay oo hoos u dhigay Xanuunka Safmarka noqday ee Covid-19, kaas oo sababay hoos u dhac dhaqaale.

Ka soo kabashada hoos u dhaca dhaqaale ee uu sababay Covid-19, ayaa la rajaynayaa in Xaaladu ku soo noqoto caadigeedii sanadka 2022.

Siyaasadaha dawladdu qayb ayey ka ahaayeen u-saldhigidda ascaarta oo lagu hakiyey halkii u hooseysey muddo sadexsandood ah, taas oo keentay in Shilinka Somaliland kor u soo hinqado. Kor-u kacii dhaqaalaha ayaa soo laabtay, muggii ganacsiguna dib ayuu u laxaadsaday. Soo-Xoogaysashada dhaqaalaha oo ay raacday dib-u habeynta dawladdu ku samaysay hawlaha Maaliyaddada, waxa ay keentay in haynta dawladdu korodho taas oo suurtagelisey in awoodda dawladdu ay u leedahay fidinta adeegyadii iyo mashaariicdii uu u baahnaa muwaadinku. Sannadka 2022 iyo muddada dhexeba dawladdu waxa ay filaysaa kobocyo kale oo ka muuqda haynta dawladda iyo in la kordhiyo kharashyada loogu talo galay horumarinta oo mahaddeeda in badan ay leedahay dib-u-qaabaynta lagu sameeyey cashuuraha.

### 2.1 Muuqaalka Saadaasha Dhaqaale ee Somaliland

Muuqaalka dhaqaalaha Somaliland ayaa weli ah mid aan la hubin. Saadaasha ayaa si joogto ah dib u eegis loogu sameeyaa si ka badan sidii caadiga ahayd si loo helo xogo badan oo lagu go'aan qaato. Iyadoo laga duulayo hoos-u-dhaca dhaqaalaha ee sannadka 2020, tilmaamayaasha furaha u ah Dhaqaalaha ayaa soo hagaagay 2021 iyada oo ku saleysan 9-kii bilood ee ugu horreeyay, in kasta oo ay aad u yaryihiin welina aad uga hooseeyaan sidii ay ahaayeen Xanuunka Covid-19 ka hor. Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu waxay hadda filaysaa in wax soo saarka Guud ee Guduhu (GDP) uu kobci doono 3.3% sannadka 2021, taas oo aad uga yar korodhkii i uu Dhaqaaluhu ahaa Xanuunka Covid-19 ka hor oo uu ahaa 6.2%.



### 3 Hantaqooyinka Guud ee ku yimid Dhaqaalaha

Somaliland Caalamka intiisa kale ayay kaga xidhan tahay xidhiidhada dhaqaale. Hoos-udhaca dhaqaale ee dunida ku Yimid ee ay la yimaaddeen safmarka COVID-19 iyo Ayaxa duullaanka ahi, sidaa darteed, waxa uu saamayn taban oo daran ku yeeshay dhaqaalaha maxalliga ah (sida ganacsiga oo is dhima, xawaaladaha, deeqaha, khayraadka ama dakhliga dawladda oo yaraada, iwm.). Fahamka iyo saamaynta hantaqooyinkani muhiim ayey u yihiin saadaalinta doorsoomayaasha dhaqaalaha guud iyo xulashada siyaasado hufan oo meelmar noqon kara oo Maaliyadeed ama lacageed muddada dhexe.

#### 3.1 Saamaynta Caalamiga ah ee Xanuunka Safmarka ah ee COVID-19

Laga soo bilaabo dabayaaqadii Sannadkii 2019, safmarka COVID-19 waxa uu caalamka ku hayey khasaare nafeed iyo mid Dhaqaale oo sii kordhaya iyada oo 240 Million oo qof laga helay cudurka, in ka badan 4.8 Million oo dhimasho ahna la diiwaangeliyey ilaa hadda. Badbaadinta nolosha dadka iyo ka-diyaargarowga caafimaad waxa ay kelliftay in karantiimooyin la sameeyo, la kala fogaado, la xidho ganacsiyo badan. Tallaabooyinka lagu xakamaynayo cudurka ee dunidu qaadatay waxa ay culays laxaad leh saareen dhaqaalihii iyada oo ay kala gooyeen qulqulkii ganacsiga, la waayey dakhli, shaqo la'aani timid, ganacsiyadii xidhmeen, dakhligii dawladdu hoos u dhacay ama laga leexiyey meelihii horumarinta loogu talo galay.

Haddii tallaabooyinka dawlada hore u maray ay kula tacaalayaan safmarka lagu guuleysto, waxa ay saamayn togan ku yeelan doontaa dawlada hore oo ku tiirsan xawaaladaha iyo deeqaha. Hay'adda Lacagaha Dunidu (IMF) waxa ay tilmaamaysaa inaan la hubin in dhaqaalaha dunidu si dhakhso ah uga soo kaban Karin saamaynta dhaqaale ee safmarka iyada oo ku xidhan sida ay u hanaqaadaan ama waxtar u yeeshaan tallaabooyinka xakamaynta ee la qaaday, helitaan tallaal, dabeecadaha iyo dhaqamada dadka oo wax iska beddelaan, xayiraadaha oo yaraada, iwm. Hay'adda Lacagaha Dunida (IMF) waxa ay dib u qiimaysay bishii October, 2021 saamaynta COVID-19 ee dhaqaale iyada oo saadaalinaysa in dhaqaalaha dunidu uu kor- u kici doono 6% sanadka 2021 halka uu 4.1% kor u kici doono 2022 . Dalalka saxaraha ka hooseeya ayaa la saadaalinayaa in Dhaqaalahoodu uu samayn doono korodh ah 3.4% 2021 , halka uu 4.1% kordhi doono sanadka 2022 . Saadaalaha dhaqaale ee ku wajahan 2022, waxba kama gadisna kuwii Hay'adda lacagta Aduunku ay hore u samaysay bishii April 2021. Waxay saadaashu intaa ku daraysaa in wadamada Horumaray uu dhaqaalahoodu hore u soo kaban doono, halka wadamada soo koraya iyo kuwa saboolkaa la filayo inay wakhti qaadato soo xoogay-sasho uu sameeyo dhaqaalahoodu, taas oo ay sabab u tahay horumarka ay ka gaadheen wadamada hore u maray talaalka Xanuunka Covid-19. Sida ay dhigayso warbixinta Hay'adda Lacagaha Dunida (IMF) ku dhawaad 40% ayaa qaatay Talaalka Covid-19 dalalka horumaray, halka dalaka saboolkaa ah iyo kuwa soo koraya ay talaalka qaateen 20%. Sidoo kale Bangiga Horumarinta Afrika waxa uu dhinaciisa ka saadaalinayaa in Waxsoosaarka Guud ee Afrika (GDP) uu ka soo kaban doono Dhaqaale burburkii ugu xumaa ee soo gaadha mudo nus-qarni ah, kaas oo uu sababay Xanuunka Safmarka noqday ee Covid-19, islaa markaana la saadaalinayo in Dhaqaalaha Wadamada Afrika kordhi doono 3.4% 2021, halka uu -2.1% hoos u dhacay dhaqaaluhu 2020.



*Shaxda 2: wax soo saarka Guud (GDP) ee Dalalka ay Somaliland jaarka yihiin iyo kuwa ay Ganacsi wadaaga leeyihiin 2019-2022 (IMF October 2021)*

	Real GDP Growth (%)				Consumer Prices annual % change			
	2019a	2020a	2021f	2022f	2019a	2020a	2021f	2022f
<b>Global</b>	2.8	-3.1	5.9	4.9	3.5	3.2	4.3	3.8
<b>Sub-Saharan Africa</b>	3.1	-1.7	3.7	3.8	8.2	10.3	10.7	8.6
Kenya	5.0	-0.3	5.6	6.0	5.2	5.2	6.0	5.0
Ethiopia	9.0	6.1	2.0	n/a	15.8	20.4	25.2	n/a
Uganda	7.7	-0.8	4.7	5.1	2.3	2.8	2.2	5.0
Djibouti	7.5	1.0	5.0	5.5	3.3	1.8	1.2	2.0
<b>Other Main partners</b>								
Saudi Arabia	0.3	-4.1	2.8	4.8	-2.1	3.4	3.2	2.2
United Arab Emirates	3.4	-6.1	2.2	3.0	-1.9	-2.1	2.0	2.2
Thailand	2.3	-6.1	1.0	4.5	0.7	-0.8	0.9	1.3
Malaysia	4.4	-5.6	3.5	6.0	0.7	-1.1	2.5	2.0
India	4.0	-7.3	9.5	8.5	4.8	6.2	5.6	4.9
<b>Somaliland*</b>	6.2	-3.1	3.3	3.3	4.6	3.5	4.1	5.4

a=actual, f=forecast

**Ilwareed: Wasaaradda Qorshaynta Qaranka**

### 3.1.1 Dhibaataada Deyn Qaadasho ee Xanuunka Covid-19 Afrika ku keenay

Tan iyo markii uu bilaabmay Xanuunka Covid-19 bilowgii sannadkii 2020, waxa badiba caalamka soo gaadhay dhaqaale burbur baaxad leh gaar ahaan Wadamada Africa, taas oo Ganacsiyo badan xidhmeen, shaqo la'aantiina korodhay.

Si hadaba wax looga qabto hoos u dhacaa dhaqaale ayaa wadamo badan oo Africa ahi dalbadeen Amaaho ay ku soo badhi taarayaan dhaqaalahooda si ay maalgalin ugu sameeyaan. wadanka koonfurta Sudan ayaa amaahday lacag GDP-gooda ka noqonaysa 0.02% halka South Africa ay inayana amaahatay maalgalin GDP-gooda ka noqonaysa 10.4%.

Sida uu saadaalinayo Bangiga horumarinta Africa, waxa la saadaalinayaa in Africa u baahan tahay maalgalin dheeraad ah 154 billion sanadadda 2021 /2022 si ay wax uga qabtan dhibaatooyinka dhaqaale.

Si hadaba ay deymahaa isaga bixiyan dalalka saboolka ahi waxay qaadan doontaa inay la ciirciiran tobonaanka sano ee soo socda.

Hase yeeshee, aqoonsi la'aanta Somaliland, waxay sababtay in aynaan helin ammaah iyo deeqba, si aynu ugu badhi taageerno saameynta dhaqaale ee Xanuunka safmarka ahi gaadhsiiyey dhaqaalaha Somaliland. Balse taas badelkeed, Dawladda Somaliland waxay sameysay siyaasaddo caawinaya yareynta khasaaraha dhaqaale iyo caafimaad ee uu sababo Xanuunkani, isla markaana kobcin kara dhaqaalaha iyo bad-qabka dadkaba.

### 3.2 Heerka Xanuunka Covid-19 Somaliland ee billaha January ilaa September 2021

January ilaa September 2021 , tirada dadka laga baadhay Xanuunka Covid-19 waxay dhamaayeen 63,078 qof, dadka laga helay xanuunku waxay dhamaayeen 5,392 qof, halka dadka u dhintay ay ahaayeen 382 qof. Sidaa si la mid ah tirada dadka laga helay xanuunku waxay 9% ka yihiin tirada dadka la baadhay, halka tirada dhimashadu ay 7% ka tahay tirada dadka laga helay xanuunka.

Marka loo eego si bille ah, billaha March iyo April 2021 , ayaa la diiwaan galiyay tiradii dhimashada ugu badnayd oo kala ahayd 103 iyo 117qof , halka tirada xanuunka laga helay ay ugu badnayd bisha September 2021 , oo laga helay 1,803 qof isla markaana ka badan tahay 589% bishii ka horaysay ee August oo tiradu ahayd 261.



Sida ka muuqata jaantuuska 1aad iyo shaxda 3aad, dadka laga helay xanuunka Rubuca 3aad ee July-Sep waxay 41% ka badan tahay tiradii laga helay isla rubucii ka horeeyay ee April-June, taas oo laga dheehan karo in soo laba kaclaynta Xanuunka Covid-19 ee mawjada labaad (second Wave) ugu badan tahay Rubuca 3aad gaar ahaan bisha September, halka tirada dhimashadu ugu badnayd Rubacii 2aad isla markaana dhimashadu hoos u dhacday Rubuca 3aad 25%. Hoos u dhacay dhimashada ee Rubuca 3aad waxa loo nisbaynayaa dedaalada Wasaaradda Horumarka Caafimaadku ugu jirto bad-baadinta nafaha iyo horumarka ay ka samaysay qaybinta qalab neefsashada taas oo ay qayb ka ahayd kaalmadii aan ka helnay dalka aan xidhiidhka leenahay ee Taiwan.


Dhanka kale, waxa horumar wayn laga sameeyay talaalka xanuunka Covid-19, taas oo ilaa hada tirada talaalka ina soo gaadhay tahay 185,000, tirada dadka qaatay talaalka ay yihiin ilaa 166,800 qof taas oo ka dhigan in 90% la qaatay talaalkii ina soo gaadhay

*Shaxda 3: Xaalada Xanuunka Covid-19 ee billaha January ilaa September 2021*

	DADKA LA BAADHAY	DADKA LAGA HELAY	TIRADA DHIMASHADA
<b>JANUARY</b>	3951	63	3
<b>FEBRUARY</b>	4548	238	8
<b>MARCH</b>	9265	1512	103
<b>APRIL</b>	7225	1209	117
<b>MAY</b>	5340	256	33
<b>JUNE</b>	5712	23	3
<b>JULY</b>	6098	27	2
<b>AUGUST</b>	8986	261	16
<b>SEPTEMBER</b>	11953	1803	97
<b>TOTAL</b>	<b>63078</b>	<b>5392</b>	<b>382</b>



**Jaantuus 1: tirada dadka la baadhay, inta laga helay iyo Tirada dhimasha Xanuunka Covid-19 Billaha Jan-Sep 2021**



**Il-Wareed:** Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka

### 3.3 Ayaxa

Dowladda Somaliland iyadoo kaashanaysa Hay'adda Qaramada Midoobay u qaabilsan Cunnada iyo Beeraha ee (FAO), ayay si wadda jir ah ula tacaalayaan Ayaxii ugu badnaa uguna saamaynta badnaa ee la arko muddo laga joogo 75 sanno. Sida laga soo xigtay Wasaaradda Horumarinta Beeraha Somaliland, Ayaxan dalka ku habsaday ayaa ka soo hayaamay dalka aynu jaarka nahay ee Itoobiya, sida caadiga ahna Ayaxu wuxu hoy ka dhigtaa meelaha buuralayda ah, kaas oo ku dambeeyey labada Gobol Buuraley ee Sanaag iyo Awdal. Daraasad ay dhawaan samaysay Wasaaradda Horumarinta Beeraha waxay shaaca ka qaaday in mawjadahii Axayu khasaare ba'an gaadhsiiyeen hab-nololeedkii beeralayda. Iyadoo laga duulayo qiyaasaha ay samaysay wasaaradda Beeruhu waxay burburiyeen ama waxyeelleeyeen ku dhawaad 300,700





Higtar oo dhul beereed iyo dhul daaq-simeed isugu jira intii u dhaxaysay february 2020 ilaa April 2021 , Intaa waxa dheer khasaare Baaxadleh oo ay gaadhsiiyeen dad ku dhaw 269,500 qof kuwaas oo u baahan gargaar cunno oo deg-deg ah

Waxa muuqata in duullaankii ayaxu horseedey waxsoosaarka beeraha oo aad hoos ugu dhacay waddamada uu saameeyey, ascaarta qutal-daruuriga oo kor u kacday, dakhligii oo yaraaday iyo dhaqaalahii beeraleyda waddamada Bariga Afrika oo si baaxad leh hoos ugu hoobtay. Waxa dhibtan sii xoojineysay kala-go'a ganacsiga iyo hoos-u-dhaca celceliska dakhliga ee saamaynta safmarka COVID-19 iyo ayaxu wadajir ula yimaaddeen.

Iyadoo dowladdu filaysa inay sii socdaan roobabka waaweyn ee dalka ka da'aya, ayaa Wasaaradda Beeruhu saadaalinaysaa inay soo laba kac-layn doonaan mawjado kale oo Ayaxa.

Dowladdu waxay sii wadi doontaa talaabooyinka ay kaga hortagayso xakamaynta Ayaxa sida; buufinta Ayaxa iyo dardar galinta wacyigalinta bulshada Beeralayda ah.

Waxay kale oon meesha ka maqnayn sii wadidda taakulaynta iyo caawinta dadka uu waxyeelada u gaysatay Ayaxu ee uu hab-nololeedkoodii saameeyay.

### 3.4 Joojinta Xoolihii loo Dhoofin jiray Xajka

Sidaan wada ognahay, waxa sannadkan iyo kii ka horeeyay dalka Sucuudigu joojiyey gudashada Xajka sababo la xidhiidha Xanuunka Covid-19 awgeed, kaas oo aanu u dhoofin jirtay Xoolo badan wakhtiga Xajka.

Sidaa awgeed, xayiraadaa sucuudigu saaray Xajka waxa ay inugu keentay in Dhaqaalihii inaga soo geli jiray dhoofinta Xoolaha wakhtiga Xajka la waayo, isla markaana uu is dhimo dakhligii aan hore ugu qoondeynay in uu inaga soo galo dhoofka xooluhu.

### 3.5 Xaalada qala-laase ee ka jirta Dalka Itoobiya

Itoobiya waa dal aynu jaar nahay kaas oo ay mudooyinkii dambe ka taagnaayeen Xaalad qalaqaase, isla markaana ay saameyn Amni iyo mid dhaqaalaba inagu keenayaan hadba xaaladda dalku sida ay tahay.

Hadaba, intii xaaladan degenaasho la'aantu ka jirtay Itoobiya, waxa muuqata in uu is dhimay dakhligii aan ka heli jirnay badeecooyinkii u gudbi jiray dhanka Itoobiya, isla markaana ay mararka qaar hakad galaan badeecooyinka dhankooda inooga iman jirtay sida Qaadka iyo Khudaarta kuwaas oo wax yeeleeyey guud ahaan Dakhliga.



## 4 Xaalada Guud ee Dhaqaalaha

### 4.1 Sicir-bararka


Dhamaan qiimayaasha badeecooyinka dalka ayaa kordhay, halka uu wax yar ka nasilan yahay heerka sixir bararku Rubuca 3aad ee 2021 marka loo eego Rubucii 2aad. Heerka sicir-bararka billaha ah ayaa ah 0.7% Rubbuca 3aad ee 2021, kaas oo ka yar kii sadexdii bilood ee Rubucii 2aad oo ahaa 0.9%, balse wax aan badnayn ka badan marka loo eego halkii uu marayey sagaalkii bilood ee sanadkii 2020.

Isbed-bedelka Ififaalaha xaalada sadexda bilood ee soo socdaa waa mid aad u adag in la saadaaliyaa, maadaama ay wali jiraan xaaladihii uu keenay Xanuunka Safmarka ee Covid-19. Inkastoo xayiraadihii dhanka socdaalka badi Caalamaku qaaday, hadana waxaynu filaynaa in kor u kaca ascaarta badeecaduhu kor u kacaan maadaama laga cabsi qabo in jirtaanka xanuunku uu sii daba dheeraado sida hadaba muuqata.

Shaxda 4: Cel-celiska Sicir bararka oo Rubuc Rubuc ah 2020 ilaa 2021

	Headline		Core		Food crops & related items		Energy, Fuels & Utilities	
	2020	2021	2020	2021	2020	2021	2020	2021
Q1	0.7%	0.3%	0.2%	0.2%	4.2%	0.7%	0.7%	0.9%
Q2	0.9%	0.9%	0.8%	0.9%	3.4%	1.2%	-1.7%	0.5%
Q3	-0.1%	0.7%	0.2%	0.5%	-1.8%	1.9%	0.3%	0.0%
Average Jan-Sept	0.5%	0.6%	0.4%	0.6%	1.9%	1.3%	-0.2%	0.5%

Jaantuus 2: Sicir bararka Sannadlaha ah ee Qaybaha waaweyn (sanadka laga duulayo 2012)





**SHAXDA 5: Saadaasha Mudada dhexe ee heerka sicir-bararka Somaliland**

Scenarios	2020a*	2021 f	2022 f	2023f	2024f
Scenario 1 (optimistic)	3.5%	4.1%	5.4%	6.5%	6.5%
Scenario 2 (conservative)	3.5%	3.0%	4.1%	5.4%	6.5%

*IL-Wareed: Wasaaradda Qorshaynta & Horumarinta Qaranka (MoNPD)*

**4.2 Sarrifka Lacagta**


Isku bedelka sarrifka shilinka iyo Doolarka iyo heerka sicir-bararka ayaa si isku dhaw u wada socday laga soo bilaabo sanadkii 2018 sida ka muuqata jaantuuska hoos ku yaal.

Qiimaha shilinka Somaliland wuxu hoos u dhacay 0.1% intii u dhexeysay January ilaa September 2021, sidoo kale, celceliska Qiimaha Alaabta ee billaha ah ayaa kordhay bishiiba 0.7% billaha January ilaa September 2021.

Bangiga Somaliland oo kaashanaya wasaaradda Horumarinta Maaliyadda iyo daneeyayaasha kale, ayaa salka u dhigay kuna guulsaytay inay xasiliyan isku bedelka shillinka Somaliland iyo Doolarka Maraykana, isla markaana saamaynta uu samaynayey ay yarayd laga soo bilaabo March 2019-kii.

Sidoo kale, Bangiga Somaliland iyo wasaaradda horumarinta maaliyadu waxay filayaan in sarrifka shilinka ee Doolarka maraykanka lagu hayn doona 8,000 ilaa 8,500 SL\$H/USD.

*Jaantuus 3: Heerka sarrifka shilinka Somaliland ee USD iyo heerka sicir-bararka (%) January 2018 ilaa September 2021*



*IL-wareed: Bangiga Dhexe ee Somaliland*



### 4.3 XAWAALADDAHA


Iyadoo laga duulayo xogta laga soo uruuriyey **4 Bangi** oo waaweyn iyo **17 Xawaaladood** oo ku yaala somaliand, lacagaha la soo xawilay iyo kuwa dalka laga xawilay labaduba waxay sheegayan korodh intii u dhaxaysay January ilaa September 2021 , marka la barbar dhigo labadii sano ee ka horeeyay ee 2020-kii iyo 2019-kii.

Lacagaha la soo xawilay waxay kordheen 23% iyo 28% marka la barbar dhigo sannadada 2020 iyo 2019, halka lacagaha dalka laga xawilay ay kordheen 17% iyo 21%. Sida ka muuqata jaantuuskan hoose, xawaaladuhu waxay muujiyeen soo kor u kac tan iyo markii uu bilaabmay Xanuunka Covid-19.

Wasaarada horumarinta maaliyadu waxay rajaynaysaa in lacagaha dalka loo soo xawilo iyo kuwa laga xawilo kordhaan marka la gaadho Rubuca 4aad ee 2021 isla markaana la filayo inay dhaafaan intii ay xawilaaduhu ahaayeen sannadkii 2020.

korodhkaa la filayo waxa loo nisbaynayaa in Ganacsigii Caalamku ku soo noqdo sidii uu ahaa Covid-19 ka hor, isla markaana baayac-mushtarku furfurmi doono shaqooyinkiina dib u bilaabmi doonaan.

*Jaantuus 4: Xawilaadaha lacagaha la soo diray iyo kuwa laga diray Somaliland jan-2020 ilaa Sep 2021 (US\$ Milions)*



**IL-wareed: Bangiga Dhexe ee Somaliland**



## 4.4 GANACSIGA

### 4.4.1 Dhoofinta Xoolaha

Tirada xoolaha dhoofay intii u dhaxaysay January ilaa September 2021, waxay dhan tahay **1,731,954** million Neef, waxay **63%** ka badan yihiin tiradii xoolihii dhoofay isla bilihii u dhigmayey ee 2020 oo ahaa **1,064,070** million Neef . Si kastaba ha ahaatee, waxay **1%** ka yaryihiin tiradii xoolihii dhoofay sanadkii 2019 (taas oo ka yar 13,817 oo neef).

Dhoofka xoolaha ee Idaha iyo Riyaha ayaa kordhay 77% iyo 2% marka loo eego labadii sano ee ka horeeyay ee 2020 iyo 2019.

Dhanka kale, Lo'da iyo Geela dhoofay Rubuca 3aad ee 2021 , ayaa waxoogaa ka yar marka la barbar dhigo intii dhoofay labadii sano ee 2020 iyo 2019 oo ay ka yaryihiin midkiiba 53% iyo 44%.

Tirada xoolaha dhoofay ilaa hadda ayaa muujinaysa yididiilo fiican iyadoo ay jirtay in sucuudigu joojiyey xoolihii aan u dhoofin jiray Xajka. Sidoo kale, tirada xoolaha dhoofay sanadka 2021 , waxay aad ugu dhaw yihiin tiradii Xoolihii dhoofay sanadkii 2019 ee aan xayiraadii xoolaha ee sucuudigu jirin iyo xanuunka safmarka ah ee Covid-19.

Kor u kacaa dhoofka xoolaha ayaa loo nisbayn karaa tirada Adhiga dhoofay oo 94.4% ka noqonaya tirada guud ee Xoolaha dhoofay halka sanadkii ka horeeyay ee 2020 –ka ay ka ahaayeen 86.8%


Wasaaradda horumarinta maaliyaddu waxay saadaalinaysaa in korodhka celceliska dhoofka xoolaha ka sarayn doono intii uu u kordhi jiray sida sannadlaha ah oo ahayd 7%, isla markaana filaysaa inuu kordhi doono 9% sanadaha 2022 , 2023 iyo 2024 marka xajka la furo.

#### *SHAXDA 6: Is-barbardhiga Wadarta Tirada Xoolaha Dhoofay Rubuca 3aad ee Sanaddada 2019, 2020 iyo 2021*

		2019	2020	2021
<b>Dhoofinta Geella</b>	Q1	19,283	2,451	12,855
	Q2	16,478	19,180	7,550
	Q3	9,434	32,138	4,911
	<b>Total Jan-Sept</b>	<b>45,195</b>	<b>53,769</b>	<b>25,316</b>
<b>Dhoofinta Lo'da</b>	Q1	36,627	32,694	33,262
	Q2	31,991	21,266	23,841
	Q3	34,016	32,929	17,920
	<b>Total Jan-Sept</b>	<b>102,634</b>	<b>86,889</b>	<b>75,023</b>
<b>Dhoofinta Adhiga</b>	Q1	125,799	146,094	365,413
	Q2	137,665	246,524	764,413
	Q3	1,334,478	530,794	501,789
	<b>Total Jan-Sept</b>	<b>1,597,942</b>	<b>923,412</b>	<b>1,631,615</b>
<b>Wadarta Xoolaha Dhoofay</b>	Q1	181,709	181,239	411,530
	Q2	186,134	286,970	795,804
	Q3	1,377,928	595,861	524,620
	<b>Total Jan-Sept</b>	<b>1,745,771</b>	<b>1,064,070</b>	<b>1,731,954</b>



**Jaantuus 5: Wadarta Xoolaha dhoofay oo bille ah ilaa 2019 (Bidix) iyo Noocyada Xoolaha dhoofay intii u dhaxaysay Jan-Sep 2020 iyo 2021 (Mididg)**



**II Wareed: W/H/Maaliyadda**

**4.4.2 Soodejinta 1**

Qul qulkii ganacsiga ayaa is dhimay sanadaha 2020 iyo 2021, taas oon ku koobnayn carqaladaynta silsiladda sahayda (supply chain) ee hoos u dhigtay wax soo dejinta, balse ay jiraan qodabo kale oo weheliya sida: Xanuunka Covid-19, lacagihii la soo xawli jiray oo yaraaday, qiimihii koonteenaradda oo aad u kacay iyo ganacsiyo badan oo albaabada loo laabay intaaso oo is biirsatay waxay sababeen in baaxadii wax soo dejintu hoos u dhacdo -1.6% sanadka 2020 marka la barbardhigo sanadkii 2019

Wasaaradda horumarinta maaliyaddu waxay saadaalinaysaa in qiimayaasha badeecooyinka soo degaa kor u kici doono mustaqbalka dhaw.

Marka laga eego saadaasha dhanka wanaagsan waxay sheegaysaa in qiimayaasha badeecadaha soo degaa ay si tartiib-tartiib ah u soo u kici doonaan sanadka 2022, isla markaana ay ku soo noqon doonaan caadigoodii sanadka 2023, halka marka la qaato saadasha ah in xaaladu ku sii socon doonto sida ay hadda tahay ay sheegayso in hadii Xanuunka Covid-

<sup>1</sup> Soodejinta qiimayaal aan isbedelin ayaa loo gooyey Somaliland – taas oo macnaheedu yahay in qiimayaashu Buugga Qiimayntu aanu isbedel ku iman doonin sannadka. Waxa intaa dheer in qiimayaasha ku qoran USD ee Buugga dib loogu qiimeeyey heerka Rasmiga ah ee Dawladda u degsan.




19 uu sii socdo qiimaha soo dejinta badeecaduhu ahaan doona mudada dhexe kuwa aan samayn korodh badan. Sida ka muuqata shaxdan hoose

**SHAXDA 7: Saadaasha Mudada -dhexe ee koboca Qiimaha badeecadaha la keeno Somaliland**

Scenario	2020a*	2021 f	2022 f	2023f	2024f
Scenario 1 (optimistic)	-1.6%	9.0%	7.6%	5.7%	5.7%
Scenario 2 (conservative)	-1.6%	5.7%	5.7%	5.7%	5.7%

**Jaantuus 6: is bed-bedelka Sanadadii hore iyo Saadaasha Mudada dhexe ee qiimaha Korodhka wax soo dejinta Somaliland**





## 5 Shaqaalaysiinta Dawladda 2018 ilaa 2022

Sida ka muuqata shaxda 8aad, Laga soo bilaabo 2018 tirada Shaqaalaha Dowladda Dhexe waxay kordheen 7,268 qof, una dhiganta (42%), marka la eego cel-celiska (Average) tirada shaqaaluhu kordhayaan shantii sano ee u dambaysay waxay ahayd (8%)

Tani waxa ay ka tarjumaysaa heerka Adeeg kordhinta iyo fursadaha shaqo abuur ee ay Dowladdu Samaysay shanti sano ee u dambaysay.


Korodhka tirada shaqaalaha meelaha laga xusi karo waxa ka mid ah:

- Dhalinyaradii loo qootay Mashruuca Shaqo qaran
- Shaqaalaysiintii shaqaalihii ku meel gaadhka ahaa ee Wasaaraddaha iyo Hay'addaha Dowladda
- Kordhinta shaqaalaha Caafimaadka
- Kordhinta shaqaalaha Waxbarashada (macalimiinta
- Iyo korodhka guud ee shaqaalaha Wasaaraddaha iyo Hay'addaha

**SHAXDA 8: Korodhka Shaqaalaha Dowladda 2018 ilaa 2022**

Sannadka	Shaqaalaha	Isbedelka %
2018	17,240	
2019	18,838	9%
2020	20,805	10%
2021	23,686	9%
2022	24,508	3.4%

**Jaantuus 7: Shaxda Tirada Shaqaalaha 2018 ilaa 2022**



**Il wareed:** Wasaaradda H.Maaliyadda






## 6 CIMILADDA

### 6.1 ROOBABKA DA'AY 2021

Iyada oo lagu dhex jiro welwelka uu la yimid safmarka COVID-19 iyo Ayaxu, oo ay weheliso baaxadda saamaynta bulsheed iyo dhaqaale ee taban ee ay la yimaadeen, ayaa haddana waxa war naallo leh u ah Somaliland inay heshay roob ku filan, isla markaana la filayo inay wax weyn ka bedelaan dhaqaalaha dalka gaar ahaan Beeraha iyo Xoolaha. Shaxda hoose waxa ay tusaysaa qotada roobabka oo laga diiwaangeliyey 20 goobood. Sida ka muuqata Jaantuuska 8aad, goobaha intooda badani waxa ay heleen roobab ku filan sagaalka bilood ee hore ee sannadka. Taas oo lagaga baaqsan karo abaar sannadka inta ka hadhay.

*Jaantuus 8: Cabirka Heerka Roobabka (MM) ee laga diiwaangeliyey 20 goobood oo kala duwan Jan-Sep 2021*



**Il-wareed:** Wasaaradda Horumarinta Beeraha




## 7 WARBIXINTA HAB-SAMI U SOCODKA MIISAANIYADDA 2021

### 7.1 Soo jireenka warbixinta wax-qabadka Miisaaniyadda

Dawladda Somaliland waxay sannadihii u dambeeyay si joogto ah u horumarinaysay uruurinta dakhliga iyo kharash-galka dowladda. Uruurinta dakhliga dhabta ah iyo kharashaadka dowladda ayaa si joogto ah u kordhayay sanadba sanadka ka dambeeyey. Marka loo eego si sannad-sannad ah, dakhliga dhabta ah iyo kharash galka dowladda laga soo bilaabo sannadkii 2014 waxay kordhayaan celcelis ahaan 6%. Sidaa darteed, dawladdu waxay si joogto ah ugu soo dhawaatay inay gaadho bartilmaameedkeeda dakhli ururinta ee miisaaniyadda. Marka la eego dhanka kharash-galka dowladda, hoos u dhac waxoogaaya ayaa ka muuqday gaar ahaan sannadadii 2017 iyo 2018 oo mid waliba uu yoolkii kharash galkii la filayey ka hooseeyay 8.4% iyo 9.3%, taas oo ay ugu wacnayd abaarihii darnaa ee inagu dhacay sanadahaas.

*Jaantuus 9: Odoraska Dakhliga iyo Dakhliga dhabta ah ee Sannadaha 2017-2020*



### 7.2 Dakhli Uruurinta Jan-Sep 2021

January ilaa September 2021, Dowladda Somaliland waxay uruurisay 1,617 Trillion SLSH (taas oo aanay ku jirin deeqaha Bangiga Aduunku), isla markaana 15% ka badan dakhligii soo xarooday Jan-Sep, 2020 oo ahaa 1,416 Trillion SLSH.

Marka lagu daro deeqaha Bangiga Aduunka dakhliga guud ee soo xarooday waa 1,640.8 Trillion SLSH. Sidaa awgeed, dakhliga guud ee soo xarooday Jan-Sep waxa uu 2.8% ka badan yahay odoraskii la rabay in la gaadho sagaal biloodka Jan-Sep oo ahaa (1,573.5 Trillion SLSHs), oo ay Ilaahay ka sokow mahadeeda leedahay Wasaaradda horumarinta Maaliyaddu oo muujisay karti iyo dedaal dheeraada.

Dadaaladdan dib u habbeynta Mamulka Cashuuraha iyo Kastmaddu waxay salka ku hayaan kor u kaca dakhli ururinta oo ku salleysan salbalaadhinta cashuurta, fudeydinta cashuur bixinta, diiwaan-galinta cashuur bixiyeyaasha, adeegsiga



tiknoolajiyadda, fulinta siyaasadda Cashuuraha iyo dhaqan-galinta cashuurta libka iyo adeegga ee Hudheeladda, Korantadda, Isgaadhsiinta.

Cashuuraha ururintoodda dadaalka fiican laga sameeyey marka loo eego qoondoyntii sanad miisaaniyadeedka 2021-ka , waxa ka mid ah:

- Cashuurtra diiwaangalinta
- Cashuurta libka
- Cashuurta Maamulka
- Cashuurta Macaash macaashka Cashuurta Soo dajinta
- Cashuurta laga jaro shaqaalaha rayidka ah
- Cashuurta macaashul mashaashka ganacsiga
- Cashuurta moorka.

Waaxda Kastamada iyo Waaxda Cashuuraha Berriga ayaa soo xareeyey 95% dakhliga la helay, waaxda kastamada oo qudha ayaa soo xaraysay 75% ka mida dakhliga soo baxay sagaal biloodka Jan-Sep, 2021 .

Dhanka kale, 12 billion SLSH oo u dhiganta 1% ayay waaxda kastamadu dhaafeen odoraskii dakhli ee laga filayey.

Sidoo kale, waaxda Cashuuraha Berrigu waxay dhaafeen odoraskii dakhli ee laga filayey sagaalka bilood 34 billion SLSH oo u dhiganta (11% dheeraad ah)

Dakhli ururinta bisha September waxay ka badan tahay dakhligii soo xarooday bishii ka horaysay ee August (4.2% ama 7.7 bn SLSH). Korodh bileedkaa oo ay ka mid yihiin cashuuro ay lacag badan ka soo xareetay bishan September sida: cashuurta iibka (GST) kirada dekada berbera iyo cashuurta dulsaarka shidaalka


**Shaxda 9: Uruurinta Dakhlig dhabta ah iyo Odoroska Dakhliga oo kooban (SLSH) Jan-Sep 2021**

DESCRIPTION	Budget Forecast (annual)	Budget Forecast (to date)	Actual revenue collection (to date)	Difference	%
<b>Taxes</b>	<b>1,989,210,638,441</b>	<b>1,491,907,978,831</b>	<b>1,535,002,671,589</b>	<b>43,094,692,758</b>	<b>3%</b>
Income and profits	38,597,928,345	28,948,446,259	33,575,586,516	4,627,140,257	16%
Payroll and workforce	104,627,873,889	78,470,905,416	87,137,770,034	8,666,864,618	11%
<b>Goods and Services</b>	<b>693,653,695,275</b>	<b>520,240,271,456</b>	<b>554,143,857,072</b>	<b>33,903,585,616</b>	<b>7%</b>
Sales tax	283,206,571,401	212,404,928,551	213,557,947,661	1,153,019,110	1%
Excise	22,986,356,931	17,239,767,698	13,043,035,808	-4,196,731,890	-24%
Registration taxes	54,273,536,980	40,705,152,735	63,325,870,758	22,620,718,023	56%
Other taxes on G&S	333,187,229,964	249,890,422,473	264,217,002,845	14,326,580,372	6%
<b>International Trade</b>	<b>1,060,064,260,762</b>	<b>795,048,195,571</b>	<b>790,080,148,696</b>	<b>-4,968,046,875</b>	<b>-1%</b>
Taxes on imports	898,232,053,322	673,674,039,992	672,784,109,677	-889,930,315	0%
Taxes on exports	65,047,134,764	48,785,351,073	48,071,036,675	-714,314,398	-1%
Port taxes	96,785,072,675	72,588,804,506	69,225,002,344	-3,363,802,162	-5%
<b>Other Taxes</b>	<b>92,266,880,171</b>	<b>69,200,160,128</b>	<b>70,065,309,271</b>	<b>865,149,143</b>	<b>1%</b>
2% tax in Eastern Regions	91,622,171,648	68,716,628,736	69,993,239,771	1,276,611,035	2%
Other	644,708,523	483,531,392	72,069,500	-411,461,892	-85%




<b>Other Revenue</b>	<b>108,789,361,559</b>	<b>81,592,021,169</b>	<b>82,094,073,598</b>	<b>502,052,429</b>	<b>1%</b>
Property Income	38,754,388,656	29,065,791,492	27,049,877,330	-2,015,914,162	-7%
Sales of Goods and Services	60,777,729,668	45,583,297,251	48,631,329,680	3,048,032,429	7%
Fines and Voluntary Transfers	9,257,243,235	6,942,932,426	6,412,866,588	-530,065,838	-8%
<b>TOTAL</b>	<b>2,098,000,000,000</b>	<b>1,573,500,000,000</b>	<b>1,617,096,745,187</b>	<b>43,596,745,187</b>	<b>2.8%</b>
<b>Grants</b>	<b>67,417,897,120</b>	<b>50,563,422,840</b>	<b>23,390,791,410</b>	<b>-27,172,631,430</b>	<b>-54%</b>
<b>TOTAL</b>	<b>2,165,417,897,120</b>	<b>1,624,063,422,840</b>	<b>1,640,487,536,597</b>	<b>16,424,113,757</b>	<b>1%</b>

Jaantuus 10: Wadarta Dakhli Ururinta iyo Hay'addaha ka Masuulka ah (Billion SLSH) Jan-Sep 2021



Jaantuus 11: Dakhli Ururinta Kastamada iyo Cashuuraha Berriga oo Goobaysan, Jan-Sep 2021






### 7.3 Kharash-galka Dowladda Jan-Sep 2021

Laga soo bilaabo January ilaa September 2021 , kharash galka dowladdu wuxu ahaa 1.44 trillion SLSH. Marka la barbar-dhigo yoolkii kharash galka dowladda ee January ilaa September 2021, waxa laga hoos maray 11% ama (173 billion SLSH). Dhinac kale hadii laga eego waxay ka dhigan tahay in Miisaaniyadii Guud oo ahayd 2.167 trillion SLSH laga isticmaalay Jan-Sep 2021, **66.4%** (taas oo ay ku jirto 65.5 Billion SLSH lagu ansixiyey kabis Miisaaniyadeed Rubucii 2aad ee 2021 ) ( supplementary budget)

Marka loo eego si sadex bilood leh ah, kharash galka dowladda ee sadex biloodka July-Sep 2021, waxa uu ka yar yahay sadex biloodkii ka horeeyay ee April June 4.6%, halka kharash galka Dowladda ee Rubucii 3aad July-Sep 2020 uu ka badnaa Rubucii 2aad April-June 2020, (**7.3%**).

*Jaantuus 12: Kharash galka Dowladda oo Sadex bilood leh ah 2019, 2020 iyo 2021 Billions SLSH*



### 7.4 Is-barbardhiga kharash-galka Dowladda 2020 iyo 2021

Guud ahaan isticmaalka miisaaniyadda ayaa si habsami ah u socda marka la eego sagaal biloodka January ilaa September 2020, sidaa si la mid ah kharash galka Mashaariicda Dowladda, libsigga hantida raagta iyo kharashka hawlsocodsinta ayaa laga gaadhay guul weyn isla markaana si habsami ah u socda.

Waxa xusid mudan in sannad Miisaaniyadeedkii 2020, ay habsami u socodkii kharashaadka hakad galisay Xanuunka Safmarka ah ee Covid-19, kaas oo sababtay in Mashaariicdii horumarineed iyo libsigii hantida raagta ay Dowladu hakad galisay amaba ay ka leexisay meelihii horumarka laga fulinlahaa, Isla markaana guntiga dhiisha la isaga dhigay sidii loo xakamayn masiibadii xanuunka Covid-19.

Taas bedelkeeda, waxa xusid mudan in habsami u socodka kharash galka dowladu uu si fican u socdo ilaa hada, iyadoo aanay jirin kharash dhimis ama kharash joojin la sameeyay sidii dhacday sanadkii 2020.



Iyadoo laga shidaal qaadanayo xaaladii sannadkii hore ee 2020, waxa la filayaa in kharash galka dowladu uu aad kor ugu kici doono marka la gaadho Rubuca 4aad ee sanadkan, isla markaana uu si habsami ah u socon doona kharash galka Dowladdu iyada oo aan wax kharashaad ah la hakin amaba aan la dhimin

Si maamulka Miisaaniyadda loogu ilaaliyo sidii loo qorsheeyey, waxay Wasaaraddu dadaal dheeraad ah ka sameysan:

- Tayeynta shaqaalaha ka hawl-gala waaxda miisaaniyadda, waaxda IT-ga iyo xisaabaadka guud;
- Siinta tababarro Caalami ah oo kor loogu qaadayo aqoontooda;
- Xeeldheerayaal lagu kabay si loo raaco halbeegyada xisaabaadka ee caalamiga ah;
- Nidaamka iswada ee FMIS-ka oo sanadahan wax-badan laga bedelay isticmaalkiisa oo laga dhigay mid waafaqsan nidaam-xisaabeedka caalamiga ah;
- La socod iyo qiimayn joogto ah oo lagu sameeyo nidaamka kharash-gal ee hay'adaha dawladda.

fulinta arrimahan kor ku xusani waxay keeneen in guud ahaan hanaankii kharash-bixintu wanaagsanaado, nidaamka dib u habbeynta Maamulka Maaliyaddu toosnaado, adeegsiga SLFMIS-ka ee dawladda dhexe, Dawladdaha hoose iyo Hay'adaha madaxa-banana kordho. Sidoo kale, mudada kharash-bixintu qaadan jirtay la yareeyo, tayeynta wax-ku-oolnimadda Nidaamka libka ee dawladda, Maamulka lacagta naqadka ah, Diiwaan-galinta hantidda dawladda, la soocda Xisaab- xidhadda Hay'addaha dawladda u horru-marro.

Dawladdu iyada oo ka duulaysa siyaasadda daah-furnaanta iyo isla xisaabtanka ee maamul wanaagga Maaliyadda, ayaa Waxaa lagu guuleystay In SLFMIS-ku ka shaqeeyo qaybaha dawladda iyo qaar ka mid ah Hay'addaha madaxa banana iyo Dawladaha hoose, lana gaadhsiiin doono inta dhiman dhamaadka 2021- 2022-ka horaantiisa inta dhiman. Ilaa hadda hay'adaha la gaadhsiiyey hannaankan iswada ee daahfurnaanta xisaabaadka waxa ka mid ah:

1. Wakaaladaha Biyaha
2. Baanka Dhexe
3. Haamaha Shidaalka ee Berbera
4. Madbacada Qaranka
5. Dekeda Berbera iyo Dawladaha hoose ee
6. Gabiley
7. Berbera
8. Burco
9. Boorama


Dhinaca kale waxa la dhaqan-galiyey cutubyadda SLFMIS-ka ee:

1. Maamulka Daymaha Qaranka (Debt Management Module)
2. libka SLFMIS-ka ee Wasaaraddaha iyo Hay'addaha Dawladda
3. Qandaraasyadda Qaranka,
4. Hantidda Raagta ee Dawladda
5. Lacag qabashadda

Kuwaas oo dhammaantood kor u qaadaya ujeedooyinka Maamul Maaliyadda ee Qaranka.



**Jaantuus 13: Isbarbar dhiga kharsh-galka Dowladda oo Qayb-Qaybsan 2020-2021**



## 7.5 Warbixinta Mashaariicda 2% Horumarinta Gobolada Barri 2021

Sida aan ka war hayno, waxa dowladdu Miisaaniyadda uga qoondaysaa kharash gaara oo loogu talo galay in lagu horumariyo Gobolada Barri gaar ahaan Sool iyo Sanaag, taas oo sanadadii ugu dambaysay laga fuliyay Goboladaas Mashaariic Horumarineed oo wax ku Oola, Bulshada Deegaanadaasina aad u soo dhaweeyeen.

Mashaariicda Horumarineed ee laga fuliyay Goboladaasi waxay isugu jiraan sidan hoose:

- Dhisme Dugsiyo
- Dhismayaal MCH
- Dhismayaal Wadooyin
- Dhismayaal Saldhigyo Boolis
- Dhisme Jaamacadeed
- Dhisme Garoono
- Iyo fidinta Maamulka Dowladda

Marka la eego Mashaariicda loo qorsheeyay inay baxdo Sanadka 2021, waxa ilaa hada la sii daayay 8 mashruuc kuwaas oo intooda badan la sii daayey, inta hadhsana la filayo inay baxdo ka hor inta aan sanadku dhamaan, kuwaas oo kala ah:

- Wadada Laascaanood iyo kalabaydh
- Wadada Tabca
- Wadada Widh-widh
- Dhismaha MCH-ka Dararweyne
- Dhismaha Xafiiska Degmada iyo Saldhiga Booliska Sarmaanyo
- Dhismaha MCH-ka dabala - Xagare
- Dhismaha Saldhiga Booliska Cirshiida
- Dhismaha Jaamacada Laascaanood
- Dhismaha Cusbitaalka TB-da Ceel afweyn
- Dhismaha Kastamka Gambadha ee W/H/Maaliyadda




## 7.6 Kharash galka Mashaariicda Bangiga Adduunka ee Jan-Sep 2021

Laga soo bilaabo January ilaa September 2021, mashaariicda laga maal-galiyo sanduuqa Bangiga Aduunka ee kala ah DRM&PFM, CSSP iyo SEAP waxa Miisaaniyadoodii laga isticmaalay 19.3 billion SLSH, taas oo ka hoosaysa yookii kharash-galkooda Miisaaniyadda Guud 60%. Marka si guud loo eego, 30.24% ayaa ilaa hada laga kharash gareeyey Miisaaniyadoodii guud oo ahayd 63.9 billion.

Marka dib loogu noq-do sida ay ahaan jirtay kharash-galka Mashaariicda Baanku Aduunku, badiyaaba sadex biloodka dambe ee sanadka ayuu isticmaalka miisaaniyaddu badan yahay, waxaana la filayaa in marka la gaadho Oct-Dec 2021, kharash galku xawli ku socon doono.

*Jaantuus 14: Kharash galka Mashaariicda uu Maalgaliyo Bangiga Aduunku Jan-Sep 2021*







## 8 Miisaaniyada Dowladda Dhexe 2022

### 8.1 Siyaasadaha Miisaaniyadda 2022

#### 8.1.1 Siyaasadda Maaliyaddeed (fiscal policy)

##### **8.1.1.1 10% Cashuur Dhimista Raashinka Qootul-Daruuriga ah**

Tan iyo markii uu dilaacay Xanuunka Safmarka ah ee Covid-19 bilowgii sanadkii 2020, waxa gebi ahaan-ba laga dareemayey Caalamka Qiimihii Ascaarta badeecooyinka oo kor-u kacay, taasi oo ay ugu wacan tahay qulqulkii badeecooyinka oo yaraaday.

Iyadoo hadaba uu jiro qodobkaa aan kor ku soo xusnay, ayaa waxa inaga dal ahaan inoo Raacay laba Masiibo oo kale, oo kala ah; Ayax ku habsaday Dalagii aan beeran jirtay iyo Abaar laga soo sheegayo Gobolada qaar, la filayana inay ku baahdo dalka intiisa kale.

Hadaba xukuumadu iyadoo maanka ku haysa qodobadaa aan kor ku soo sheegnay, waxay go'aan satay in Qiimaha Raashinka Qootul-Daruuriga ah ay u samayso **10%** Cashuur dhimis ah Mudo lixbood ah , si loo kabo Ganacsatada isla markaana lagu hayo Qiimaha Raashinka halka uu hada taagan yahay, iyo ka hor tag laga hortagayo in Qiimaha Raashinku kor kaco.

##### **8.1.1.2 Isku dheeli tirka Dakhliga iyo kharashka**

Siyaasadaa Miisaaniyadda ee 2022 waxay xooga saaraysaa in la isku dheeli tiro Dakhliga iyo kharashka. Taas oo macnaheedu yahay in miisaaniyadda 2022 lagu sargooyo Dakhliga dhabta ee la filayo Sannadka 2021 , iyadoo laga shidaal qaadanayo Dakhliga dhabta ah ee ina soo galay **Jan-Sep 2021**, Taas oo ujeedadeedu tahay in dawladdu ku xisaabtanto qoondadda dakhli ee filashadeedu sareyso oo kaliya, si looga baaqsado dheeli ku yimaadaa kharash galka iyo dakhli ururinta.

##### **8.1.1.3 Kor u qaadida saamiga ay Cashuuraha berrigu ka yihiin Dakhliga guud**

Siyaasada Miisaaniyadda ee 2022 waxay xooga saaraysaa in kor loo qaado saamiga Dakhliga Cashuuraha berrigu ka yihiin Miisaaniyadda guud iyada oo xooga la saari doono sal-balaadhinta Qeybaha Cashuuraha Berriga (Tax Base), adeegsiga tiknoolajiyadda, yareynta wakhtiga iyo talaabooyinka cashuur bixinta, fulinta ganaaxyadda iyo ciqaabaha cashuur diidka, Diiwaan-galinta dhamaan Cashuur Bixiyayaasha iyo dhaqan galinta Cashuuraha Adeega iyo Alaabta ee (GST-da)

##### **8.1.1.4 Ilaalinta iyo kobcinta waxsoo-saarka gudaha**

Si loo dhiiri geliyo loona ilaaliyo wax soosaarka dalka, waxay siyaasada Miisaaniyadda 2022, dhiirgalinaysaa waxsoo-saarka gudaha, taas oo loo samayn doono Cashuur Dhaaf Alaabta Caydhiin ee ay u baahan yihiin Warshadaha Dalku (Raw Material) iyo Qalabka Kalluumaysiga iyo Beeraha. Isla markaana la dejiyay Siyaasado lagu ilaalinayo wax soosaarka gudaha sida:

- in la jideeyo Cashuur lagu ilaaliyo wax soo saarka gudaha oo lagu soo rogo Badeecooyinka la midka ah ee ka imanaya Dibeda
- in suuq dibedeed loo raadiyo wax soo saarka gudaha.
- In daraasad laga sameeyo xaaladda tartan dhaqaale ee wadamadda jaarka



### **8.1.1.5 Diyaarinta Aagga loogu talo galay Warshadaha (Industrial Zone)**

Si loo dhiiri galiyo Maalgashadayaasha, waxa loo baahan yahay Aag loogu talo galay Warshadaha isla markaana u fududaynaysa Maalgashadayaasha Gudaha iyo Dibed-ba inay helaan dhul ay maalgalin ku sameeyaan.

Si hadaba taasi u hirgasho, waxa siyaasada Miisaaniyadda 2022 ku jirta in Xukuumadu libiso Dhul loogu talo galay Warshadaha

### **8.1.1.6 Sii wadida Mashruuca Shaqo Qaran**

Sidaan wada ogsoon nahay, waxa xukuumadu hirgalisay sadexdii sano ee u dambeeyey Mashruuca Faa'iidada badan laga dheefay ee shaqo qaran, kaas oo shaqo Abuur u sameeyay 2,238 oo Jaamiciiyiin Reer Somaliland ah. Kaas oo ay Dowladdu sanadkii 2019 ku bilowday 1,500 dhalin yaro ah, halka ay labadii sano ee ku xigay ka ahaayeen 738 iyo 500 qof.

Sidaa awgeed, siyaasadda Miisaaniyadda 2022 waxa ka soo baxday in la sii wado Mashruuca shaqo qaran, kaas oo loo qoondeeyay in la qaato 500 qof Sannadka 2022 .

### **8.1.1.7 Kaydka ku -talo galka Dhacdooyinka lama filaanka (Contingency fund)**

Si qaranku uga gaashaaman-karo intii awoodiisa ah arrimaha ay keenaan Masiibooyinka dabiiciga ah ee dunida ka dhacaya sida: Fatahaadaha, Duufaanaadaha, Abaaraha, Xanuunadda iyo wax kasta oo lama filaana, waxa miisaaniyadda 2022 la laban- laabay qoondadii loo qoondeeyay in lagula tacaalo arrimaha lama filaanka ah hadii ay dhacaan ilaahay inaguma keenee

### **8.1.1.8 Abuurida Sanduuqa wax ka qabashada Xanuunka Covid-19, iyo ku darista Miisaaniyadda Dakhliga ka soo xarooda Covid-19.**

Sidaan wada ogsoon nahay, waxa Dunida ka dilaacay dhamaadkii sanadkii 2019, Xanuunka safmarka noqday ee Covid-19, kaas oo dhibaato laxaadle leh u gaystay guud ahaan Caafimaadka Bulshada iyo Dhaqaalihii Caalamaka.

Si hadaba Xukuumado uga gaashaamato soo noqoshada Xanuunka Covid-19 oo hadaba dalal badan ku soo laba kacleeyey, waxay Xukuumadu Miisaaniyadda 2022 u qorshaysay Qoondo loogu talo galay in lagula tacaalo oo si degdeg ah looga jawaabo fidaanka Xanuunka, sidoo kalena lagu horumariyo guud ahaan Caafimaadka

Dhanka kale, si ay u cadaato Nidaamka isla xisaab-tanka iyo daah-furnaantu, waxa Miisaaniyadda 2022 lagu daray fiiga laga qaado dadka laga baadhayo xanuunka Covid-19 ee dhoofaya, taas oo ka muuqata Miisaaniyadda 2022 iyada oo dakhli iyo kharash-ba ah.

### **8.1.1.9 Joojinta qaadista lacagaha aan sharciga ahayn (illegal fees)**

Waxa jirta in Wasaaraddaha iyo Hay'addaha Dowladda Dhexe qaar ka mid ahi qaadaan lacago aan sharci ahayn. Sidaa awgeed, waxaan dhamaan la mamnuucay in la qaado lacago /ujuurooyin aan sharciga Maaliyaddadu jideyn, kuwaas oo joojintooda xukuumaddu hore qoraalo uga soo saartay. Sidaa darteed, Siyaasadda Miisaaniyadda 2022-ku, waxay mamnuucaysaa qaadista lacago/ujuurooyin aan shuruucda maaliyaddu jideyn.



### **8.1.1.10 Fududeynta Nidaamka Cashuur bixinta.**

Siyaasadda Miisaaniyadda 2022 waxay dhiirglinaysaa fududeynta nidaamka Cashuur bixinta, taasi oo qofka Cashuurta ku waajibtay si sahlan u bixin doono, isla markaana la sameeyay system Electronic ah oo la yidhaahdo E-Cash, kaas oo qofku ku bixin karo Cashuurta adeegyada electronic ah ee lagu dhex isticmaalo Tilifoonka sida Zaad iyo Edahab. Dhinaca kale, waxay siyaasadda Miisaaniyadu sii xoojinaysaa sii wadidda nidaam Electronic ah oo u saamaxaya Cashuur bixiyuhu in uu isaga oo jooga goobtiisa ganacsi ku soo bixin karo Cashuurta (Taxpayers' on-line portal). Waxa kale oo siyaasaddu tilmaamaysaa yareynta wakhtiga iyo talaabooyinka lacag bixinta cashuuraha berriga iyo Kastamadda, fulinta ganaaxyadda iyo ciqaabaha kale ee xeerka dakhliga iyo Kastamaddu ku jideeyeen cashuur- diidka iyo cashuur la baxsigaba.

### **8.1.1.11 Hiralinta dhamaan qaybahiisa kala duwan Nidaam Xisaabeeda iswada ee (SLFMIS)**

Waxa qaabxisaabeedka dowladda lagu isticmaala nidaamka iswada ee (Somaliland Financial management Information System) ,sidaa awgeed waxa Miisaaniyadda 2022 qorshaysan in la dhaqan galiyo dhamaan qaybaha kale ee uu ka kooban yahay nidaamka SLFMIS isla markaana la gaadhsiiyo dhamaan Dawladaha hoose, Hay'adaha Madax abanaan, Mashaariicda Mucaawinooyinka ah iyo dhammaan goboladda iyo degmooyinka dalka, si loo gaadho yoolka dawladda ee isla xisaabtanka iyo daah-furnaanta Maamulka Maaliyadda..

### **8.1.1.12 Ka Qayb qaadashada Diyaarinta Miisaaniyadda ee Bulshada rayidka ah**

Sida uu tilmaamayo nidaamka Maamulka Maaliyaddu, waxay siyaasadda Miisaaniyadda ee 2022 ay sii adkeynaysaa sii wadidda kulamadda wada tashi ee dadweynaha, ururadda aan dawlaga ahayn iyo Wasaaradda Maaliyadda.

Kulamadaas oo looga dan leeyahay in dadweynuhu qeyb ka ahaadaan geedi soocdkii diyaarinta Miisaaniyadda iyo in ay talo ku yeeshaan go'aaminta mudnaanaha Miisaaniyadda.

Kullamadan wada tashiga ee dadweynaha oo la bilaabay saandkii 2020-ka, waxay soo jeediyaan talooyin muhiim ah oo ay ka mid ahaayeen sanadkan

- Kor u qaadida cahuuraha si sharciga waafaqsan;
- in la xoojiyo maalgalinta warshadaha iyo wax-soosaarka;
- in miisaaniyadda ay ka muuqato dakhliga ka soo xorooda baadhista covid-19 ee cisbitaalka hargaysa lagu qabto iyo dakhliyada kale e ka maqan;
- Faahfaahinta saamiga dawlada faa'iido wadaaga Dekeda Berbera;
- Xoojinta adeega naafada;
- Dhiirgalinta shaqo abuurka danyarta;
- Isku dheeli tirka mashaariicda ee Deegaanadda iyo Gobolada
- Horumarinta kaluumaysiga;
- In la kordhiyo isla xisaabtanka, wada-tashiga miisaaniyadana la gaadhsiiyo gobolada;
- In miisaaniyada lagu saleeyo qorshaaha guud ee qaranka;
- In la korodhiyo qoondada caafimaadka iyo faya dhawrka;
- Ku darista manhajka waxbarashada culuumta cashuuraha.



## 8.1.2 Siyaasadda lacageed (Monetary policy)

### 8.1.2.1 Sicir bararka

Siyaasadda Miisaaniyadda 2022 waxay xooga saaraysaa xakamaynta sicir-barbarka, iyadoo yoolka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda iyo Bangiga dhexe yahay in lagu hayo sicir barbarka 5%-6%, taasoo la dhaqan galiyay siyaasado loogu haynayo sicir bararka 5% ilaa 6%. Sida:

- in isticmaalka shilling ka Somaliland la xoojiyo isla markaana shay kasta oo Dowladdu iibsadayso lagu iibsado shilinka somaliland
- in lacagaha electoric ah ee lagu dhex isticmaalo mobile-da aan la iskugu diri Karin wax ka yar \$100

### 8.1.2.2 Isku bedelka Sarifka lacagaha

Siyaasada Miisaaniyadda ee 2022, waxay xooga saaraysaa siyaasada lacageed ee dhanka safirka lacagaha, taasi oo la doonayo in sarifka lagu hayo 8,000-8,500 slsh.

Sidoo kale, dawladda waxay joojisay daabacaadii lacagta 4tii sanno ee Xukuumadani xilka haysay, waxana ka go'an sii wadida siyaasadda lagu joojinayo daabacaadda lacagta, si dhaqaalaha iyo sarifkaba loogu sii hayo heerarka sare lagu tilmaamay.

## 8.1.3 Meelaha Mudnaanta la siiyey Miisaaniyadda 2022

Miisaaniyadda dawladda ee 2022, sida ku cad *Shaxda 13*, kharash-galka waxa loo leexiyey meelaha la is leeyahay waxay, door ka geysanyaan Horumarka iyo Baahiyaha Aasaasigaa eew Bulshada sida: caafimaadka, Ammaanka, Biyaha Aqoonsi-raadinta, Cilmi Baadhista, waxsoosaarka, warshadaha, horumarinta da'yarta, shaqalaysiinta, Doorashooyinka, Waxbarashada iwm).

### *Shaxda 10: Meelaha Mudnaanta la siiyey Miisaaniyadda 2022*

MUD-NAANAHA MIISAANIYADDA 2022
<p><b>Amaanka</b></p> <p>Kordhinta iyo tayaynta ciidamada</p> <p>Kordhinta mushaharka ciidamada kala duwan 30%</p> <p><b>Biyaha</b></p> <p>Biyo balaadhinta hargaysa</p> <p>Qodista xafiir dhaamo iyo Ceel biyoodyo gobolada oo dhan</p> <p><b>Caafimaadka</b></p> <p>Dhismayaasha xarumaha hooyada iyo dhalaanka</p> <p>Ka hortaga iyo xakamaynta Covid-19 iyo horumarinta Caafimaadka guud ahaan</p> <p>Tayaynta cusbitaalad gobolada iyo cusbitaalka wayn ee hargaysa</p> <p><b>Deegaanka</b></p> <p>Fidinta seerayaasha</p> <p><b>Maamulka</b></p> <p>Baarlamaankii hore mushaharkoodii oo hal sano ah</p> <p>Dardargalinta ololaha ictiraaf raadinta</p>



Fidinta hay'addaha maamulka ee goboladda sool iyo sanaag  
Kordhinta kaydka qaranka  
Maalgashiga saamiga fayberka ee Dawladda  
Mashruuca shaqo qaran  
Tayaynta Garsoorka  
Xoojinta Xog Ururinta(strengthening statistics)  
Doorashooyinka

**Wadaagaha kale**

Iibsiga idaacad fm ah oo dalka wada gaadha  
Shaqo abuurka (startup cost)  
Horumarinta dhalinyarada

**Waxbarashada**

Cilmi baadhista  
Kor u qaadida iskuulada farsamada gacanta  
Ololaha kor u qaadka heerka wax akhriska iyo qoraalka

**Wax-soosaarka**

Iibsga doonida kalluumaysiga ee kuuliyada barashada cilmiga badda  
Iibsga laabbaratoriga caafimaadka xoolaha  
Samaynta cilmi baadhiso ku saabsan badeena  
Taakulaynta kalluumaysatada  
Xoojinta mashruuca cilmibaadhista ee aburiin

**Kaabayaasha Dhaqaale**

Sanduuqa Horumarinta Caasimada

## 8.2 Guud-marka Guud ee Odoroska Dakhliga 2022

Yoolka Odoroska Dakhliga la hiigsanayo Sannadka 2022 waxa uu ka badan yahay **15%** kii Sanadkii 2021 ama (**309 billion SLSh**), sidaa darteed Odoroska 2022 waxa lagu saleeyay dakhliga dhabta ee soo xarooday mudada sagaalka bilood jan-Sep 2021, iyo siyaasada dhaqaalaha guud sida:

- Wax-soosaarka guud ee dalka
- Heerka sicir bararka iyo sarifka lacagaha qalaad
- Dhoofka xoolaha nool
- Dhaqdhaqaaqa ganacsiga caalamiga ah

Halka qaar ka mid ah dakhliyadda si gaara loo eegay laguna saleeyay saamaynta safmarka Covid-19 uu ku yeelan doono odoroska dakhliga 2022, iyadoo Somaliland kala mid tahay wadamada jaarka iyo kuwa caalamka saamaynta safmarku ku yeeshay dhaqaalaha guud iyo dakhligii dawladaha guud ahaanba.

### 8.2.1 Meelaha la filayo in uu ka yimaado korodhka Dakhliga 2022

Waxa la filaya Sannadka 2022 in dakhligu kordho 15%, ayadoo ay sabab u tahay qodobadan soo socda;



- Cashuuraha an tooska ahayn ee Badeecada soo dega iyo Cashuuraha saaran Badeecadaha iyo Adeega (GST); kor u kaca Badeecadaha soo dega iyo Fulinta siyaasada GST ayaa la filaya iyana in dakhli badan ka soo xarodo Sannadka 2022 .
- Dardar galinta Cashuuraha Macaashal Macaashka iyo Cashuurta laga helo shaqalaha rayidka
- Markii ugu horaysay Sannadka 2020 dawladda Somaliland waxa ay fulisay cashuraha xakamaynta Alaabta iy Adeega, iyado si tartiib tartiib ah loo gaadhsiiin doono xadiga uu sharcigu waajibiyey, sida cashuurta xakamaynta sigaarka, alaabta la isku qurxiyo, baabuurta raaxada IWM.
- Qoondada daryeelka Dhimirka oo la korodhin doono, Wasarada Horumarinta Maaliyadda iyo Ganacsatada qaadlayaashu ayaa isla qaatay in la korodhiyo qoondadii hore lagana dhigidoono qoondada cusub **300 SI.sh** halka kiilo ee qaadka ah halka markii hore ay ka ahayd **200 SI.sh**.
- Korodhka dhoofka xoolaha oo la rajaynayo inuu kor u kici doono Sannadka 2022 marka la barbar dhigo sanadkan 2021 ee lagu jiro. Saamaynta safmarka COVID19 oo keentay in Xajka la joojiyo Sannadkan 2021 taas oo hoos u dhigtay dhaqalaha guud ee dalka, hadaba waxa la rajaynaya Sannadka soo socda 2022 in Dhoofka xoolahu dib u furmo.
- Dakhliyada ka imanaya Wasaradaha iyo hayadaha Dawladda 2022 ; Wasarada shaqo galinta iyo arimaha bulshada ayaa la rajaynaya in kor loo qaado bixinta ruqsada shaqada Sannadka 2022 , Halka Wasarada boosaha iyo isgaadhsiinta la filayo inay soo ururiso dakhliyo badan oo ka imanaya isgaadhsiinta, Hirarka iyo boosaha, dhanka kale Wasaaradda Warfaafinta iyo Wacyi-galintu waxay kor u qaadi doonto ruqsadaha warbaahinta.
- Baadhista xanuunka covid-19 ayaa la filayaa in dakhli badani ka soo xaroon-doono sanadka 2022 iyadoo miisaaniyadda lagu daray odoroska dakhligan lagu saleeyey kii u soo xarooday cisbitaalka 2021 .
- Sidoo kale Hay'adda Dhowrista Tayada ayaa la filayaa inay dakhli soo xarayso

## 8.2.2 Faah-faahinta Goobaha uu Dakhligu ka imanayo Miisaaniyadda 2022

Sida ka muuqata jaantuska iyo shaxda hoose 98% Dakhliga guud ee dawladda waxa uu ka iman doona Kastamada iyo Cashuuraha Berriga, halka 2% uu ka iman doono Wasaradaha iyo Haya'ddaha kale ee dawladda. Saamiga ugu badan waxa uu ka iman doona Kastamada 78% halka cashuuraha Berigu ka yihiin 20%. Geesta kale, Saamiga kastamada ayaa wali ah kan ugu badan Dakhliga Dawladda tan iyo intii Somaliland jirtay, taa cakiskeeda, Saamiga Cashuuraha Berriga ay ka yihiin dakhliga Guud ayaa kordhay marka loo eego sanadkii hore oo ay ahaayeen 18%.

Tani waxay ka turjumaysa siyaadada Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda oo yoolkeedu yahay sare u qaadida dakhliga Cashuuraha berriga, maadaama cashuuraha Berigu yihiin saamiga ugu badan ee dawladuhu dakhliga ka helaan.


### SHAXDA 11: Faaf-faahinta Goobaha uu Dakhligu ka imanayo Miisaaniyadda 2022

FAAHFAAHIN	HAYADAHA IYO WASARADAHA	MIISAANIYADA
C/Bariga		488,218,301,227
Kastamka		1,856,749,059,977
Daakhliga Faafinta & Iidhehda	W/Warfaafinta iyo Dhaqangelinta	2,387,845,231
Dakhliga kale ee Boosaha & Isgaadhsiinta	W/ Isgaadhsiinta iyo Tiknolojiyada	7,507,049,287
Dakhliga Liisamada Ganac/& Ruqsooyinka	W/ Ganacsiga, Warshadaha iyo dalxiiska	20,192,489,136
Dakhliga Ruqsadaha Beeraha	Wasaaradda Beeraha	230,691,295



Dakh/Feega Kaluumaysiga Bada	W/Xanaanada Xoolaha iyo Kaluumaysiga	2,085,630,931
Dakh/Liisamada/Ruqsooyinka Macdanta	Wasaradda Macdanta iyo Tamarta	1,074,009,762
Khidmada warqada ogolanshaha shaqada (Work Permits for foreigners)	W/ Shaqada iyo Arimaha Bulshada	2,142,948,981
Deeqda Hayadaha Caalamiga ah	Deeqda Bangiga Aduunka	3,850,000,000
Dakhliga baadhista cuntada iyo caafimaadka	Hayada Tayada iyo dhawrista	2,800,000,000
Dakhliga Kirada Guryaha & Bakhaarada	Wasaarada H/Guud	352,101,347
Dakhliga libka Khayraadka Dalka	W/ Deegaanka iyo H.Reer miyiga	519,395,081
Dakhliga gadida hantida Maguurta ah	libka Hantida Dawlada	36,237,990
Dakh/Nootaayooyinka	Wasaaradda Cadalada iyo garsoorka	419,373,753
Dakhliga baadhista Covid-19	Wasaaradda Caafimaadka	19,723,675,536
Dakhliga Ruqsadaha Dhismaha	W/Hawlaha Guud	800,000,000
Dakhliga Ruqsadaha Mihnadaha Caafimaadka	Komishanka Mihnadaha Caafimaadka	654,085,000
Dakhliga Ruqsadaga Ururadda dalka iyo kuwa Hay'adda Caalamiga ah	W/Qorshaynta Qaranka	710,000,000
<b>Sub Total</b>		<b>65,485,533,330</b>
<b>Wadarta Guud ee Dakhliga</b>		<b>2,410,452,894,534</b>

Jaantuus 15: Goobaha uu Dakhligu ka imanayo Miisaaniyadda 2022



### 8.2.3 Odoros Dakhliga Kastamada oo Deegamaysan 2022

Sida ka muuqata jaantuska 16aad iyo shaxda 12aad, Odoraska Dakhliga laga filayo Kastamadu waa **1,856 Trillion SLSH**, kaas oo **13%** ka badan odoroskii 2020. Marka la isku dul taago Goob-goob, kastamka Berbera ayaa ah kan dakhliga ugu badan ka soo xaroon doono Miisaaniyada kastamada 2022 **65.6%**, halka Kastamka Kalabaydh oo ah kastamka labaad ee ugu dakhliga badan laga filayo **21.4%** saamiga dakhliga kastamada. Sidoo kale, kastamada Saylac iyo Madaarka Hargeisa ayaa laga filayaa **6%** iyo **2.2%**. Dhanka kale, isu geynta kastamada kale ayaa laga filayaa **4.8%**.


SHAXDA 12: Odoros Dakhliga Kastamada ee Miisaaniyadda 2022 oo Deegaamaysan

Goobta	Oodoros Dakhliga 2022	Ku talo galka Dakhliga 2021	Faraqa	% Is bedelka	% saamiga Guud
Allaybaday	4,020,260,457	3,754,636,279	265,624,178.00	7%	0.2%
Abaarso	288,838,096	263,235,005	25,603,091	10%	0.0%
Bali-gubadle	7,258,367,229	7,100,192,287	158,174,942	2%	0.4%
Beer	171,769,778	155,351,957	16,417,821	11%	0.0%
Berbera	1,217,249,294,283	1,078,054,348,391	139,194,945,892	13%	65.6%



Boorama	22,678,450,987	20,147,074,927	2,531,376,060	13%	1.2%
Burco	5,132,035,283	4,734,903,383	397,131,900	8%	0.3%
Caasha-cado	3,206,431,092	2,899,363,324	307,067,768	11%	0.2%
Caynabo	1,736,929,430	1,546,787,445	190,141,985	12%	0.1%
Dilla	30,048,325	27,271,125	2,777,200	10%	0.0%
Farawayne	6,540,971,786	6,246,193,031	294,778,755	5%	0.4%
Hargaysa	940,284,070	861,934,887	78,349,183	9%	0.1%
Kalabaydh	398,094,827,128	354,457,721,097	43,637,106,031	12%	21.4%
Laascaanood	8,390,023,387	6,063,014,204	2,327,009,183	38%	0.5%
Lug-haya	443,633,164	401,119,603	42,513,561	11%	0.0%
Kashtamka Hargeisa Airport	41,198,151,326	38,252,973,943	2,945,177,383	8%	2.2%
Ceerigaabo	2,815,874,680	1,621,398,068	1,194,476,612	74%	0.2%
Wajaale	24,027,893,447	21,895,893,231	2,132,000,216	10%	1.3%
Xariirad	999,931,544	918,786,811	81,144,733	9%	0.1%
Zaylac	111,525,044,485	99,149,343,181	12,375,701,304	12%	6.0%
<b>Total</b>	<b>1,856,749,059,977</b>	<b>1,648,551,542,179</b>	<b>208,197,517,798</b>	<b>13%</b>	<b>100.0%</b>

Jaantuus 16: Saamiga Goob Waliba ka tahay Wadarta Guud ee Kastamada Miisaaniyadda 2022



#### 8.2.4 Odoros-ka Dakhliga Cashuuraha Berriga 2022 oo Deegamaysan

Sida ka muuqata jaantuska 17<sup>aad</sup> iyo shaxda 13<sup>aad</sup> ee hoose, Odoroska dakhiga Cashuuraha Berriga ee Miisaaniyadda 2022 waa ( 488 Billion SLSH), waxaanu ka badan yahay 15% ku talo galkii sanadkii 2021. marka la eego dhanka Saamiga ay Goob waliba ka tahay Dakhliga guud ee Cashuuraha Berriga, Hargaysa ayaa ah tan ugu badan isla markaana laga filayaa inay soo saarto kala badh in ka badan **68.6%** Wadarta Guud ee Dakhliga Cashuuraha Berriga, halka ay ku soo xigto Berbera oo noqonaysa **16.7%**, Boorama **4.4%** , Burco **4.2%** iyo Gabiley **2.3%**, Halka wadarta goobaha kale ee Cashuuraha Berrigu noqon doonan **4.6%**.






**SHAXDA 13: Odoroska Dakhliga Cashuuraha Berriga Miisaaniyadda 2022 oo Deegaamaysan**

GOOBTA	ODOROSKA 2022	ODORASKA DAKHLIGA 2021	FARAQA	% IS BEDELKA	% Saamiga	Guud
SAAXIL	81,840,015,082	69,607,984,605	12,232,030,477	18%		16.76%
AWDAL	21,785,590,798	19,014,516,803	2,771,073,995	15%		4.46%
TOGDHEER	20,505,989,931	17,846,706,777	2,659,283,154	15%		4.20%
SARAAR	1,547,049,276	1,487,354,365	59,694,911	4%		0.32%
SANAAG	7,457,914,808	6,574,297,080	883,617,728	13%		1.53%
GABILEY	11,332,297,977	9,752,259,109	1,580,038,868	16%		2.32%
M/JEEX	335,296,289,979	295,966,231,771	39,330,058,009	13%		68.68%
SOOL	6,320,214,702	5,946,348,320	373,866,382	6%		1.29%
SALAL	1,339,938,873	1,070,209,176	269,729,697	25%		0.27%
DADMADHEEDH	793,000,000	710,000,000	83,000,000	12%		0.16%
<b>Total</b>	<b>488,218,301,426</b>	<b>427,975,908,006</b>	<b>60,242,393,221</b>	<b>15%</b>		<b>100.00%</b>

**Jaantuus 17: Saamiga Goob waliba ka tahay Wadarta Guud ee Cashuuraha Berriga**





## 8.3 Faah-Faahinta kharashka Miisaaniyadda 2022


### 8.3.1 Saamiga Wadaagayaasha ee Miisaaniyadda 2022

Sida ka muuqta Jaantuska iyo Shaxdan hoos ku taala, kharashka ku baxa Hay'addaha Amniga waxa uu Miisaaniyadda Guud ka yahay 36.46%, taas oo kuu muujinaysa in Amnigu Miisaaniyadda guud ka yahay sadex meelood meel yahay. Dhanka kale, Wadaagayaasha Dhaqaalaha, Maamulka, Waxbarashada, iyo Caafimaadku waxay Miisaaniyadda Guud ka yihiin kala badh 47.26%, halka ay Wadaagayaasha Biyaha, Deegaanka, Tamarta, Kaabayaasha Dhaqaalaha, Wax-soo saarka iyo Qaybaha kale ka yihiin 16.28%.

SHAXDA 14: Saamiga Wadaagayaashu ka yihiin Miisaaniyadda 2022

WADAAGAHA	MIISAANIYADDA 2021	MIISAANIYADDA 2022	FARAQA	SAAMIGA MIIS GUUD (%)
AMNIGA IYO DIFAACA	758,369,698,089	878,788,036,702	120,418,338,613	36.46%
MAAMULKA	426,365,451,126	455,329,949,430	28,964,498,304	18.89%
DHAQAALAHA	355,348,110,659	327,436,960,872	-27,911,149,787	13.58%
WAXBARASHADA	194,115,414,259	208,332,601,651	14,217,187,392	8.64%
CAAFIMAADKA	111,300,137,614	148,080,068,154	36,779,930,540	6.14%
KAABAYAASHA DHAQAALE	98,988,175,871	109,950,219,046	10,962,043,175	4.56%
QAYBAHA KALE	100,225,450,715	116,384,533,595	16,159,082,880	4.83%
WAX-SOOSAARKA	55,829,925,153	62,305,448,134	6,475,522,981	2.58%
DEEGAANKA	29,327,559,871	34,882,128,195	5,554,568,324	1.45%
BIYAHA IYO FAYO-DHOWRKA	24,355,825,232	52,638,277,503	28,282,452,271	2.18%
TAMARTA	13,774,716,211	16,324,671,053	2,549,954,842	0.68%
WADARTA	<b>2,167,000,464,800</b>	<b>2,410,452,894,335</b>	<b>243,452,429,535</b>	<b>100.00%</b>

Jaantuus 18: Saamiga Wadaagayaashu ka yihiin Miisaaniyadda 2022 oo (%)



#### 8.3.1.1 Amaanka

Guud ahaan wadaagahani wuxuu Miisaaniyadda guud ka yahay **36.46%**, taas oo udhiganta **878,788,036,702 SLSH**, wuxuu muujinyaa korodh dhan **15.88%** marka loo eego Miisaaniyadda wadaagaha ee sanadkii hore **2021**, waana wadaagaha ugu Miisaaniyadda badan taas oo ay keenatay muhiimadda uu amniga iyo difaacu u leeyihiin waddanka.

Miisaaniyadda 2022 ee wadaagahani waxay mihiimada siinayasa;

- Mashaharka Ciidamada oo **30%** loo kordhiyey



- Kor u qaadsita tirada iyo tayada Ciidanka
- Kor u qaadida adeegyada kala duwan ee ciidanka
- Iibsiga saanada Ciidanka
- Iibsiga qalabka dabdemiska

#### SHAXDA 15: Wadaagaha Amaanka iyo Dufaaca

Amniga iyo Dufaaca	Miis 2021	Miis 2022	Faraqa	Korodhka (%)	Saamiga Guud (%)	Miis
Ciidanka Ilaaladda Madaxtooyada.	31,455,908,546	33,902,193,906	2,446,285,360	7.78%	1.41%	
Hayadda Sirdoonka Qaranka	21,308,527,674	26,352,114,639	5,043,586,965	23.67%	1.09%	
Jimciyadda Muj.Sooyaal	2,433,607,500	2,390,211,719	-43,395,781	-1.78%	0.10%	
Ciidanka Asluubta.	70,428,733,885	78,814,414,305	8,385,680,420	11.91%	3.27%	
Ciidanka Booliska.	152,642,992,878	173,030,292,976	20,387,300,098	13.36%	7.18%	
Ciidanka Ilaalada Xeebaha.	20,062,101,885	25,799,105,936	5,737,004,051	28.60%	1.07%	
Ciidanka Socdaalka.	15,739,798,308	18,154,292,111	2,414,493,803	15.34%	0.75%	
Ciidanka Dab-Demiska Qaranka	14,347,900,218	16,645,786,848	2,297,886,630	16.02%	0.69%	
<b>Somaliland</b>						
Wasaaradda Gaashandhigga.	45,899,296,082	47,125,494,044	1,226,197,962	2.67%	1.96%	
Ciidanka Qaranka.	384,050,831,113	456,574,130,217	72,523,299,104	18.88%	18.94%	
<b>Miisaaniyadda loo qondeeyey Amaanka</b>	<b>758,369,698,089</b>	<b>878,788,036,702</b>	<b>120,418,338,613</b>	<b>15.88%</b>	<b>36.46%</b>	

#### 8.3.1.2 Maamulka

Guud ahaan Wadaagahani waxay miisaaniyadda guud ka yahay **18.89%** kaas oo u dhiganta **455,329,949,430 SLSH**. Sidaa darteed wadaagahani wuxuu ina tusayaa korodh ah **7.04%**. Wadaagaahni wuxuu Sannadka 2022 muhiimad gaar ah siiyey;

- Qabashada Doorashada Madaxtooyada
- Aqoonsi raadinta
- Maamul daadajinta;
- Barashada datuurka iyo xoojinta shuruucada
- Xoojinta ilaalinta hantid Qaranka iyo isla xisaabtanka

#### SHAXDA 16; Wadaagaha Maamulka

Wadaagaha Maamulka	Miis 2021	Miis 2022	Faraqa	Korodhka (%)	Saamiga Miis Guud (%)
Qasriga Madaxtooyada JSL.	819,000,000	819,000,000	0	0.00%	0.03%
Madax-weyne ku-Xigeenka JSL.	585,000,000	585,000,000	0	0.00%	0.02%
Golaha Guurtida JSL.	34,830,535,474	36,297,199,346	1,466,663,872	4.21%	1.51%
Golaha Wakiilada JSL.	38,364,435,342	61,470,461,650	23,106,026,308	60.22%	2.55%
Maxkamadda Sare.	8,169,216,678	8,024,078,654	-145,138,024	-1.78%	0.33%
Max-kamadda Hoose.	36,262,986,972	38,807,826,608	2,544,839,636	7.02%	1.61%
Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka.	10,477,974,106	10,256,687,698	-221,286,408	-2.11%	0.43%
Hay'adda Shaqaalaha Dawladda.	19,388,894,436	14,212,835,790	-5,176,058,646	-26.70%	0.59%
Machadka Shaqaalaha Dawladda	0	6,042,865,576	6,042,865,576	100.00%	0.25%



Hanti-dhawrka Guud ee Qaranka.	13,607,796,500	14,373,677,024	765,880,524	5.63%	0.60%
Xafiiska Madaxtooyadda.	82,282,948,968	72,879,778,113	-9,403,170,855	-11.43%	3.02%
Garyaqaanka Guud	4,763,918,119	5,924,041,899	1,160,123,780	24.35%	0.25%
W.Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah	48,387,720,327	51,440,282,799	3,052,562,472	6.31%	2.13%
Wasaaradda Cadaaladda & Garsoorka.	10,421,911,724	12,579,682,461	2,157,770,737	20.70%	0.52%
Guddiga Xaquuqal Insaanka Qaranka.	4,529,858,296	5,102,372,412	572,514,116	12.64%	0.21%
Wasaaradda Arrimaha Gudaha.	41,020,186,341	55,223,292,481	14,203,106,140	34.62%	2.29%
Wasaaradda Xidh Golayaasha iyo Arimaha Dastoorka	8,998,433,832	10,373,616,215	1,375,182,383	15.28%	0.43%
Komishanka dib u habaynta shuruucda	2,095,892,331	2,261,137,360	165,245,029	7.88%	0.09%
Guddiga Doorshooyinka Qaranka.	53,030,605,705	40,388,948,907	-12,641,656,798	-23.84%	1.68%
Gudida Maamulwanaaga iyo La-musuqmaasuqa	4,658,235,935	5,209,863,899	551,627,964	11.84%	0.22%
Guddida Diwaangalinta Ururada	2,669,900,040	3,075,300,538	405,400,498	15.18%	0.13%
Miisaaniyada loo qorsheeyey Maamulka	425,365,451,126	455,329,949,430	29,982,498,304	7.04%	18.89%

### 8.3.1.3 Caafimaadka

Guud ahaan wadaagahani wuxuu ka yahay Miisaaniyadda **6.14%** oo udhiganta **148,080,068,154 SLSH**, Waxaanu muujinayaa korodh ah **33.05%**, waxaana Sannadkan 2022 muhiimada siinyaa;

- Horumarinta iyo daryeelka cisbitaalada dhimirka;
- Gurmada Caafimaadka ee xaaladaha degdega ah sida Covid-19;
- Iibsiga qalabka Caafimaadka;
- Dhismaha cisbitaalka TB-ga Boorama
- Kor u qaadida badqabka bulshada dhinacyada Cuntada iyo Dawaada iyadoo la hirgalindoono baadhista tayada cuntada iyo dawaada si loo hubiyo tayada cuntooyinka iyo dawooyinka dalka soo gala
- Hirgalinta Xarumaha Hooyada iyo Dhalaanka
- Joogtaynta adeega Caafimaad ee Cisbitaalada Laascaanood iyo Ceerigaabo
- Hirgalinta adeeg bixinta goobihii Caafimaad ee la dhisay sanadka 2021.
- Baabuurta gurmada deg-degga ee caafimaadka

### SHAXDA 17: Wadaagaha Caafimaadka

Wadaagaha Caafimaadka	Miis 2021	Miis 2022	Faraqa	Korodhka (%)	Saamiga Guud (%)	Miis
Komishanka Qaranka ee Xakamaynta HIV/AIDS	4,117,133,147	6,498,691,370	2,381,558,223	57.85%	0.27%	
Wasaaradda H. Caafimaadka.	97,530,590,704	123,834,203,231	26,303,612,527	26.97%	5.14%	
Komishanka qaranka ee Mihnadlayaasha Caafimaadka	2,423,204,350	2,819,505,710	396,301,360	16.35%	0.12%	
Hay'adda Dhawrista Tayada	7,229,209,413	14,927,667,844	7,698,458,431	106.49%	0.62%	
Miisaaniyada loo qorsheeyey Caafimaadka	111,300,137,614	148,080,068,154	36,779,930,540	33.05%	6.14%	

### 8.3.1.4 Waxbarshada

Wadaagahani wuxuu Miisaaniyadda Guud ka yahay **8.64%** una dhiganta **208,332,601,651 SL/Sh** wuxuu muujinayaa korodh ah **7.32 %**, waxaana Sannadkan 2022 mudnaanta la siiyey;

- Macalimiin cusub oo tiradoodu dhantahay 300 oo macalin
- Dhismayaasha iskuulo, iyo labareeriyo cusub
- Joogtaynta adeega waxbarashada ee dugsiyada dayaxa iyo Laascaanood
- Kor u qaadida kaalmooyinka iskuulada



- libsigga gaadiidka ka hawl gala waxbarashada

### Shaxda 18: Wadaagaha Waxbarashada

Wadaagaha Waxbarashada	Miis 2021	Miis 2022	Faraqa	Korodhka (%)	Saamiga Miis Guud (%)
<b>Wasaaradda Waxbarashada &amp; Sayniska</b>	186,265,941,203	200,626,411,498	14,360,470,295	7.71%	8.32%
<b>Gudiga Tacliinta Sare</b>	7,849,473,056	7,706,190,153	-143,282,903	-1.83%	0.32%
<b>Miisaaniyada loo qorsheeyey Waxbarashada</b>	<b>194,115,414,259</b>	<b>208,332,601,651</b>	<b>14,217,187,392</b>	<b>7.32%</b>	<b>8.64%</b>

#### 8.3.1.5 Tamarta

Wadaagahani wuxuu ka yahay Miisaaniyadda **0.68%** oo u dhiganta **16,324,671,053 SI/Sh**, waxaanu muujinayaa korodh ah **18.51%**, wadaagahani wuxuu xooga saarayaa sanadka 2022

- Sii wadida xogaha ku saabsan shidaalka iyo macdanaha kala duwan ee ku jira Dalka kuwaas oo baadhistoodu ka socotay qaybo ka mida gobolada dalka
- Qalabaynta Laabka baadhista macdanta
- Nidaaminta iyo tayeynta korontada dalka;
- Ka hortagida iyo yaraynta khataraha Korontada;
- Helida koronto jaban oo macquul ah.

### Shaxada 19: Wadaagaha Tamarta

Wadaagaha Tamarta	Miis 2021	Miis 2022	Faraqa	Korodhka (%)	Saamiga Miis Guud (%)
<b>Wasaaradda Macdanta &amp; Tamarta.</b>	11,956,965,405	13,916,983,911	1,960,018,506	16.39%	0.58%
<b>Komishanka Tamarta</b>	1,817,750,806	2,407,687,142	589,936,336	32.45%	0.10%
<b>Miisaaniyada loo qorsheeyey Tamarta</b>	<b>13,774,716,211</b>	<b>16,324,671,053</b>	<b>2,549,954,842</b>	<b>18.51%</b>	<b>0.68%</b>

#### 8.3.1.6 Waxsoo-saarka

Waxsoo-saarku wuxuu Miisaaniyadda 2022 yahay **2.58%** una dhiganta **62,305,448,134 SI/Sh**, waxaanu tilmaamayaa korodh ah **11.60%**, meelaha muhiimada la siiyey sanadka 2022 ka waxaa ka mid ah;

- Kor u qaadista Cilmi baadhista iyo fidinta Beeraha;
- Xoojinta wax soosaarka kaluumaysiga
- Ka qayb qaadashada Dhismaha dekada Maydh wajjiga labaad
- Daawaynta iyo shaybaadhka Xoolaha;
- Xoolaynta Dadka danyarta ah;
- Horumarinta tijaabada taranka iyo calafka Xoolaha.
- Fulinta siyaasadaha ilaalinta iyo dhiiri-galinta wax-soosaarka gudaha
- Fulinta siyaasadda cashuur dhaafka qalabka la xidhiidha wax-soosaarka Beeraha, kaluumeysiga iyo War-hadeyntaba



### Shaxda 19: Wadaagaha Waxsoo-saarka

	Miis 2021	Miis 2022	Faraqa	Korodhka (%)	Saamiga Miis Guud (%)
Wasaaradda H. Beeraha.	19,665,902,410	17,575,600,225	-2,090,302,185	-10.63%	0.73%
Hay'adda Cilmi baadhista Beeraha	0	2,982,583,660	2,982,583,660	100.00%	0.12%
Wasaaradda Xanaannada Xoolaha iyo H.	36,164,022,743	41,747,264,248	5,583,241,505	15.44%	1.73%
Kalumaysiga					
Miisaaniyada loo qorsheeyey Waxsoosaarka	55,829,925,153	62,305,448,134	6,475,522,981	11.60%	2.58%

#### 8.3.1.7 Deegaanka

Wadaagahani Miisaaniyadda Guud wuxuu ka yahay **1.45%** oo u dhiganta **34,882,128,195 SL.SH**, waxaanu muujinayaa korodh ah **18.94%**. Wadaagahani wuxuu muhiimada siinayaa;

- Ilaalinta Deegaanka iyo ka hortaga xaalufka;
- Seera xiliyeedyada
- Daryeelka duurjoogta iyo ugaadha;
- Ka jawaabida xaaladaha degdega ah ee ay keenaan Masiibooyinka debiiciga ah
- Dhismaha Xarunta Wasaaradda Deegaanka

### Shaxda 20: Wadaagaha Deegaanka

Wadaagaha Deegaanka	Miis 2021	Miis 2022	Faraqa	Korodhka (%)	Saamiga Miis Guud (%)
Hayada u Diyaargarowga Aafooyinka iyo Kaydka Raashinka	10,189,099,111	9,787,033,234	-402,065,877	-3.95%	0.41%
Wasaaradda Degaanka & Is-Bedelka Cimilada	19,138,460,760	22,010,768,767	2,872,308,007	15.01%	0.91%
Wasaaradda Horumarinta Reermiyiga	0	3,084,326,194	3,084,326,194	100.00%	0.13%
Miisaaniyada loo qorsheeyey Deegaanka	29,327,559,871	34,882,128,195	5,554,568,324	18.94%	1.45%

#### 8.3.1.8 Biyaha

Wasaaradda biyaha oo ah Wasaaradda kaliye ee ku jirta wadaagahan waxay Miisaaniyada guud ka tahay **2.18%** una dhiganta **52,638,277,503 SI/Sh**, Wadaagahani wuxuu Sannadkan xooga saarayaa;

- Hirgalinta biyo balaadhinta Gobolada
- Biyo balaadhinta Hargaysa
- Iibsiga qalabka sahaminta biyaha;
- Iibsiga qalabka shaybaadhka biyaha.
- Dhaamam waaweyn oo gobolada laga hirgeliyo;
- Qodida ceelal dhaadheer oo laga gobolada

### Shaxda 21: Wadaagaha Biyaha Biyaha

Wadaagaha Biyaha	Miis 2021	Miis 2022	Faraqa	Korodhka (%)	Saamiga Miis Guud (%)
Wasaaradda H. Biyaha	24,355,825,232	52,638,277,503	28,282,452,271	116.12%	2.18%



Miisaaniyada loo qorsheeyey Biyaha	24,355,825,232	52,638,277,503	28,282,452,271	116.12%	2.18%
------------------------------------	----------------	----------------	----------------	---------	-------

### 8.3.1.9 Dhaqaalaha

Wadaagahani wuxuu ka yahay Miisaaniyadda guud **13.58%** oo u dhiganta **327,436,960,872** SI/Sh, wuxuu muujinayaa hoos u dhac ah **-7.85%**, wadaagahani wuxuu muhiimada siinayaa;

- Kaydka Qaranka;
- Kor u qaadista dakhli ururinta;
- Dib u-habaynta maamulka Maaliyaddada;
- Dhiirgalinta maalgashiga gudaha
- Daahfurnaanta nidaamka qandaraasyada Qaranka
- Shaqo abuurka.

#### Shaxda 22: Dhaqaalaha

Wadaagaha Dhaqaalaha	Miis 2021	Miis 2022	Faraqa	Korodhka (%)	Saamiga Miis Guud (%)
W.Qorshaynta & Horumarinta Qaranka	12,535,147,015	13,428,428,882	893,281,867	7.13%	0.56%
Wasaaradda H. Maaliyadda.	308,469,692,097	273,723,711,208	-34,745,980,889	-11.26%	11.36%
Hay'adda Caymiska Qaranka	1,107,745,766	2,255,516,302	1,147,770,536	103.61%	0.09%
Wasaaradda Ganacsiga iyo Dalxiiska	23,497,910,268	20,545,382,689	-2,952,527,579	-12.57%	0.85%
Hay'adda Aagga Cashuuraha ka caaggan	0	1,917,297,414	1,917,297,414	100.00%	0.08%
Guddiga Qandaraaska Qaranka.	3,910,155,257	4,201,170,753	291,015,496	7.44%	0.17%
Wasaarada H. Maalgashiga & Wershedaha	5,827,460,256	11,347,453,624	5,519,993,368	94.72%	0.47%
Miisaaniyadda loo qorsheeyey Wadaagaha dhaqaalah	355,348,110,659	327,418,960,872	-27,929,149,787	-7.85%	13.58%

### 8.3.1.10 Kaabayaasha Dhaqaalaha

Wadaagahani wuxuu Miisaaniyadda guud ka yahay **4.56%** una dhiganta **109,950,219,046** SL/Sh. Wuxuuna muujinayaa korodha ah **11.07%** marka loo eego sannadkii hore ee 2021, waxyaalaha uu muhiimada siinayo wadaagahani waxaa ka mida ah;

- Horumarinta wadooyinka iyo Biriijiyada;
- Iibsiga Saamiga isgaadhsiinta Fiber optic ee Dawladda
- Hirgalinta adeega boosaha;
- Isticmaalka Tiknoolajiyada ee adeega Haya'daha Dawladda;
- Nashqadaynta magaalooyinka;
- Diiwaan galinta hantida maguurtada ah;
- Horumarinta xirfadaha Tiknoolajiyada (ICT skills);
- Dakhli kordhinta;
- Horumarina madaarada;

#### Shaxda 24: Wadaagaha Kaabayaasha Dhaqaalaha

Wadagaha Kaabayaasha Dhaqaalaha	Miis 2021	Miis 2022	Faraqa	Korodhka (%)	Saamiga Miis Guud (%)
Wasaaradda Gaadiidka iyo H. Jidadka	50,624,191,087	52,679,007,842	2,054,816,755	4.06%	2.19%
Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tignoolajiyada	14,893,010,662	21,082,346,437	6,189,335,775	41.56%	0.87%



Wasaaradda Hawlaha Guud, Dhulka & Guryeynta	15,748,991,652	16,927,893,452	1,178,901,800	7.49%	0.70%
H. Duulista & Hawada.	17,721,982,470	19,260,971,314	1,538,988,844	8.68%	0.80%
<b>Miisaaniyada loo qorsheeyey Kaabeyaasha dhaqaalaha</b>	<b>98,988,175,871</b>	<b>109,950,219,046</b>	<b>10,962,043,175</b>	<b>11.07%</b>	<b>4.56%</b>

### 8.3.1.11 Wadaagaha kale (cross-cutting Sector)

Wadaagahan waxaa ku midaysan afar Wasaaradood iyo laba Hay'adood oo dhamaantood ay isugu yimaadaan adeegyada Bulshadu, waxay Miisaaniyadda guud ka yihiin **4.83%** oo u dhiganta

**116,384,533,595 SL/Sh**, waxaaynu muujinayaan korodh dhan **16.12%**. Wadaagahani wuxuu muhiimada saarayaa;

- Dhiirigalinta shaqo abuurka dhalinyarada;
- Horumarinta ciyaaraha;
- Daryeelka Dadka nugul;
- Shaqo abuurka danyarta;
- La dagaalanka iyo ka hortga mukhaadaraadka;
- Kor u qaadida kaalmooyinka bulshada ee kala duwan;
- Diiwaan galinta shaqaalaha ajaanibka ah;
- Dhismayaasha garoonada ciyaaraha.

#### Shaxda 25: Wadaagaha kale (cross-cutting sector)

Wadaagayaasha Kale	Miis 2021	Miis 2022	Faraqa	Korodhka (%)	Saamiga Miis Guud (%)
W.Warfaafinta, Wacyigelinta iyo Dhaqanka	43,104,243,446	52,976,580,081	9,872,336,635	22.90%	2.20%
Wasaaradda Diinta & Awqaafta.	9,873,119,572	15,184,762,029	5,311,642,457	53.80%	0.63%
Hay'adda Diiwaanka Sakada iyo Safalka	3,726,352,250	0	-3,726,352,250	-100.00%	0.00%
